

VOLUME
4

MAANSADA MASIIXA

Anthology of Somali
Christian Poetry



Aweis A. Ali
Series Editor

MAANSADA MASIIXA

Anthology of Somali Christian Poetry

Volume 4

First Edition, 2022

Aweis A. Ali
Series Editor



Nairobi, Kenya

Kenya Projects Organization [KENPRO] is a membership organization founded and registered in Kenya in the year 2009 under the Ministry of Gender, Culture and Social Development. The mandate of the organization is to build human and institutional capacities in the fields of Development Projects, Research and Publishing.

Kenya Projects Organization (KENPRO)

Off Magadi Road, Ongata Rongai

P.O. Box 15509 – 00503, Mbagathi - Nairobi

Tel. +254 202319748 | Mobile: +254 725 788 400

Email: infokenpro@gmail.com | Website: www.kenpro.org

EDITING, LAYOUT, FORMAT AND DESIGN


Anthony M. Wanjohi, Karen C. Afandi and James Gavvo

ISBN 978-9914-9929-8-4

First Published 2022

© Aweis A. Ali

amazingwisdom@gmail.com



This book has been published under the auspices of the Somali Bible Society

Email: info@SomaliBibleSociety.org | Website: www.SomaliBibleSociety.org



This work is licensed under a Creative Commons Attribution 4.0 Licence. You are free to copy, communicate and adapt the work, as long as you attribute the author.

TABLE OF CONTENTS

WHAT OTHERS SAID ABOUT THIS BOOK	ix
TUSMADA BUUGGA	xii
HORDHAC.....	xxvii
QIRASHADA IIMAANKA	xxviii
U DUCAYNTA KUWA EEBBE U ADEEGA	xxviii
BARYADA RABBIGA.....	xxix
SABUURKII NEBI DAA'UUD	xxix
TOBANKA AMAR EE NEBI MUUSE.....	xxx
KITAABKA QUDDUUSKA AH IYO MAANSADA.....	xxxi
AFKAYGU KA DAALIMAAYO	2
HADDAAD USHA ADIGU II QABAN.....	3
U KAALAYA CIISE EEGABA	3
HUBKIYO AALADDAAD I SIISAY	5
QAAR ABAAL LAHAYNOO	6
SOO JEEDA IDILKIIN.....	7
ABAAL WUXUU KAAGA SII DHIGAY.....	8
ANNAGU U DIYAARSAN NAHAY	8
BELO QABE IBLAYSOW	9
RUNTII USHA MIDAAD U HAYSO	10
IFTIINKAANSE HELAY BAA	11
IIMAANKANA BAL II SIYAADI.....	12
ABIDKAYBA KAAMA TEGAYEE.....	13
RUMAYSADKU KELI AHAANTII	14
OGOW LAYS XISAABINAAYO.....	15
ABAALGUD MA WAAYI DOONTID.....	16
OGOW WAX KASTOO AAN BARINNO	17
SOO ORDOO U KAALAYA	18
ABAALKAAD II GASHAY ALLAHAYOW.....	19
WAA INAYNU AHAANNO HEEGAN.....	20
INTAAN WAQTIGU KAA LUMIN	20
HAATAN INA MASIIXOO.....	22
ADIGU HA KU WADA AMMAANEE	23
ADDOONIYO ADAA MID XORA	24
INAAD TAHAY INA BELAAYO	25
WAA AMAANO CULUS	26
EEDLAWE IGA DHIGAY.....	27

AMAAN LOOW MASIIX	28
AABBOOW ILAAHOOW	29
ANIGOO DAMBILA AH	30
AARKA NOO KACAY	31
ALLOW SII GARGAAR	34
XAQU HA U BIDHAAMO	35
KA CAYMI BOHOSHA NAARTA	36
BILAASH CAFISKABA LAGUMA HANAN	37
JIDKAA BAAS KA SOO CELI	38
INJIILKA HADDAANAD BARAN	39
SILAC WAW BAREERAY	40
HA U BEER NUGLAANINA	41
INTAAN LA AFUUFIN BUUNKASE	42
BISHAARADAAN HAATAN SIDO	43
XIL WAYN BAYDIN SAARANE	44
U BAYAANI LEEYAHAY	45
MIYAAD KA BAQAYN QIYAAMAHA	46
KAMA BAXO ILAAHAY	47
BAAQUSE WUXUU YAHAY	48
BAL GUDO WAAJIBKAA KU SAARAN	49
II BOGSIYAY LAABTABA	50
BAH WEYN TA WALAALAHAA	51
BOQOROOW ILAAHAY	52
WAA BUSHAAREE	53
LIIBAANTU TAALLAA	56
TUBTA LAGU HODMEE	56
KAN NAFTIISA IGA JECEL	59
HADDAAN JIRRABAADDA GALO	60
INUU KULA JIRO MASIIXII	60
MASIIXAAN U JIDBAYSANAAYOW	61
JANADAYNU TAGAYNAA	62
JALIIL BAA NA CAAWIYA	63
EEBBOW ADI IGA XIJAAB	65
XORSE WAXAA KA DHIGA KARA	66
XOG SUGAN CIISEBA KA HAYNIN	66
XISHOODKA OGAADA	67
ALLOOW XERTA GUUSHA SII	68
DADKAA JIREE MAANTA NACAYA	71
WAXAAN DADKAA KU ORAN LAHAA	72
MARNA YUU KU DUUFSANIN	73

DEELQAAFKII WAAN NACAY	74
GARTA WAA DANTIINNEE	75
SAYIDKII I DOORTAY BAAD TAHAY	76
KU DADAALA WELIGIIN.....	77
DARIIQUNA CIISE WEEYAAN	78
RUUXSE WAXAA DULLAYN KARA.....	80
NUUR BAA KA DAALACAY	81
DOCDUU MASIIXU KAA JIRO.....	82
UGU DUCEEYA IYAGUNA	83
DOONDOONA WELIGIIN	84
XAQANA DIIDAAYA YEELKII	85
AMAR LAY FARAY DARTII BAA.....	86
HADDAANSE LOO NOQON DIYAAR.....	87
WELIGAA I DAADIHI	88
KALA DOORO LABADAAS.....	89
OGOW DAMACEEDA WAALANI	90
DUNTUNA IIGU KAA XIRNAATO.....	91
RUMAYSTA EREYGA FIICAN.....	92
DIGRIGA RABIGAAN	92
DARIIQAA MASIIX	93
DAA'IMOW ILAAH.....	94
ILLAYN WAA RAFIIQ LA HUBO.....	98
RAYN-RAYN BAAN KU NOOLAAN.....	99
RABBIGU WAA AAMINEE GARO	100
RAJADU WAY DHAWDAHAYEE	101
ADIGAA JACAYL RUN AH.....	102
RUUXDAYDII DHIMATAAD.....	103
WAA SIRE IBLAYSKUYE.....	105
KU SII SUGA MADIGII EEBBE.....	105
SIDEE LOO FIDIN INJIILKA	106
SAYIDKEENA FIICAN	107
SAACADDUU YIMAAD	108
DHIIGGAAGII II SHUBAY	112
HADDAANAD U DHALAN MAR KALE	114
DHIGASHADA KITAABKIYO	115
DAMBIGI WUU NAGA DHAQOO	116
RUUXDUBA CABID KUMA KORAYSO	118
WAASE XAAJO CULUS	119
CULIMO BAAS OO XAQDIID AH	120
IFTIIN KU CASUUMI DOONNAA	121

CAQLI LAAWAHAAN GARAN	122
WUXUU CIISE NOOGA SII DIGAY	123
DAFIRAADDA CIISAA.....	124
INAAN CIIDO HAATAN WAA DAW.....	125
CIISAA BOGSIIYEY	126
HADAL CIISE YIRI.....	127
CODSI BAAN SIDAA.....	128
ANIGU KAMA GAABIN DOONO	131
WAXAAN HUBAA GEERI DABADEED.....	132
MAANTABA GOB BAAN AHAY	133
WELIGAA I GARAB QABO.....	134
KUWAA GAALOOBAY OO IDIL.....	135
ADOON GEES KALE U LEEEXAN	136
GOCONDHADA IYO SARREENKU.....	137
U GUNTO HAWLIHII MASIIXU	138
GALLADDII AY HANTEEN DARTEED.....	139
MASIIXIYADDU WAA U GUUL.....	140
XAQA INAY GARTAANE	140
GOGOSHII BADBAADADA	141
GUULLOW MARN KUMA FARXAYSID	143
GAALNIMO KA XOROOBAY MAANTA	144
INUU GO'AY HA MOODINA	145
GUULLOW ILAAH	146
FAAFIYOO U SHEEGOO.....	149
QUDDUUSNIMO KU SII JOOG	151
MASIIX SOO QAABILOO.....	152
WADA QIRA ILAAH.....	153
CASHAR WEEYE QAALIYA.....	154
QORA OO ADKEEYA.....	156
KANIISADDII MASIIXEE.....	158
KURAYGAAGII BAAN AHAY	158
QOFKA HELA KITAABKAAS.....	159
INTAAD RABBI KAASHATAAN	160
KORREEYOOW MASIIX.....	161
XAQU IGU LINKAXAN YAHAY	164
MARTI IYO U AHAY MAGAN.....	166
DEMBIILIYO MID DAAHIRA	167
MA HURAANKII BAAD TAHAY	168
MAS'UULIYAD BAA KU SAARANE	169
MAGACAAGA SHARAFTA WAYN LEH	170

CID KASTOO MURAAD KA LEH.....	171
AYAAN MUGDIGII KA BAXAY.....	172
KUWA NEBIYADA IS MOODAY.....	173
RABBIGA MAHADDIISA WEEYAAN.....	174
MAANTANA NIMCADAAN KU JIRO.....	175
KOLKAA BAY MUUQAN DOONTAA.....	176
QIYAAMAHA MARKII LA GAARO.....	177
MUNAAFAQNIMADU WAA HALIS.....	178
MAHASANID MASIIX.....	179
NASIIBSE WAXAA LEH MAANTA.....	182
HAW U NUGLAANIN ABIDKAA.....	182
INJIILKU NARUURO WEEYAAN.....	184
NIMCAALOOW MASIIX.....	184
WARMO HAYGU GOODDIYIN.....	187
WAX WALBA U WAKIILO EEBBE.....	188
INTAAN WAQTIGU NAGA LUMIN.....	189
WADAAD XUME KA SII ROOR.....	190
INJIIL BAAN WADAAYE.....	191
ANIGU WAAN U ADEEGI DOONAA.....	192
RUUX CIISE WEHESHADAY.....	193
EEBBENA KA WARAAABIN DOONAA.....	194
WUXU SHEEGAY CIISE.....	195
MASIIXII I HELAY BAA.....	197
WADAADDADAN HALLAWSANI.....	198
KANIISADDA HAREER MARI.....	199
HADDABA AAN MASIIXA EEGNO.....	200
KU HUNGOOBI MAYSIDE.....	201
XAQA KAMA HABAABO.....	202
MARNABA INUU HUNGOOBAYN.....	203
HAATANBA QIRO BARAARKII EEBBE.....	204
HAAN IYO HARUUBKEED.....	205
KANIISADDU WAANAY HURAYNEE.....	206
HOGGAANSHIHII NAFTAYDOW.....	207
BAL YAA LA HADLOO U SHEEGA.....	208
HUBAAL GUUL BAYNU GAADHI.....	209
MASIIX BAAD KA HELI.....	209
YAAHUU INTAAN IRI.....	212

WHAT OTHERS SAID ABOUT THIS BOOK

Anthology of Somali Christian Poetry is the condensed message of Christianity; it is the message of the gospel simplified, contextualized and told in a beautifully crafted Somali poetry. This volume of theologically sound poetry will not only be a blessing to Somali Christians who read and study it but it will also serve as foundational Christian education for Somali believers and seekers alike. This volume, like the past volumes, utilizes Somali poetry to communicate the message of the Bible to Somali people.

Quule M. Egal

Somali Christian Elder

Poetry occupies a central role in the Somali culture. *Maansada Masiixa: Anthology of Somali Christian Poetry* is therefore an essential tool for the Somali church for her personal or corporate worship. I highly recommend this important book.

Noor Hassan

Abuur Cusub Ministry

This well-crafted poetry belongs to the history books of the Somali church. Special thanks to the editor and the composers. This book will continue encouraging the Somali faith community for generations to come. My eyes teared up and I felt drawn closer to the Lord when I meditated on some of the hymns in the book. This volume is arguably the best so far. I cannot wait to see the future volumes of *Anthology of Somali Christian Poetry*. Praise be to God.

Abdisalaam Ali Daahir

Evangelist and Bible Translator

I thank God for the new generation of Somali Christians who continue to create new hymns to glorify God in their mother tongue; this tradition was birthed by the Somali Christians of

the past. These new hymns illustrate the numerical growth and the quality of the Somali church. I want to thank the editor and the composers of the hymns for their remarkable work.

Abdi Duale
Somali Gospel TV

Another historical collection of Somali Christian poetry. I strongly recommend this to every Somali, whether he is Christian or Muslim. The poetry is inspirational and eye-opening.

Abdi Osman
Evangelist, Trinity Baptist Church

The poetry contained in this book was composed with great diligence, patience and perseverance. May the treasure in this book be a blessing to all.

Ahmed Philip
Evangelist and Bible Translator



DEDICATION


This book is dedicated to the late Abdulkadir Warsame Omar (01 January 1938 - 06 March 2011). He was a long-time evangelist in Somalia, Ethiopia and Kenya; he is best remembered for his astronomical confidence and sharp dressing.




TUSMADA BUUGGA


1. Afkaygu Ka Daalimaayo
Amin A. Ahmed
2. Haddaad Usha Adigu Ii Qaban
Amin A. Ahmed
3. U Kaalaya Ciise Eeggaba
Amin A. Ahmed
4. Hubkiyo Aaladdaad I Siisay
Amin A. Ahmed
5. Qaar Abaal Lahaynoo
Amin A. Ahmed
6. Soo Jeeda Idilkiin
Amin A. Ahmed
7. Abaal Wuxuu Kaaga Sii Dhigay
Amin A. Ahmed
8. Annagu U Diyaarsan Nahay
Amin A. Ahmed
9. Belo Qabe Iblaysow
Amin A. Ahmed
10. Runtii Usha Midaad U Hayso
Amin A. Ahmed
11. Iftiinkaanse Helay Baa
Amin A. Ahmed
12. Iimaankana Bal Ii Siyaadi
Amin A. Ahmed

-
13. Abidkayba Kaama Tegayee
Amin A. Ahmed
 14. Rumaysadku Keli Ahaantii
Amin A. Ahmed
 15. Ogow Lays Xisaabinaayo
Amin A. Ahmed
 16. Abaalgud Ma Waayi Doontid
Amin A. Ahmed
 17. Ogow Wax Kastoo Aan Barinno
Amin A. Ahmed
 18. Soo Ordoo U Kaalaya
Amin A. Ahmed
 19. Abaalkaad Ii Gashay Allahayow
Amin A. Ahmed
 20. Waa Inaynu Ahaanno Heegan
Amin A. Ahmed
 21. Intaan Waqtigu Kaa Lumin
Amin A. Ahmed
 22. Haatan Ina Masiixoo
Amin A. Ahmed
 23. Adigu Ha Ku Wada Ammaanee
Amin A. Ahmed
 24. Addooniyo Adaa Mid Xora
Amin A. Ahmed

- 
25. Inaad Tahay Ina Belaayo
Amin A. Ahmed
 26. Waa Amaano Culus
Amin A. Ahmed
 27. Eedlaawe Iga Dhigay
Amin A. Ahmed
 28. Amaan Loow Masiix
Y. B. Xirsi
 29. Aabboow Ilaahoow
Y. B. Xirsi
 30. Anigoo Dambiila Ah
Y. B. Xirsi
 31. Aarka Noo Kacay
Abwaan A. K. Q. Dictionary
 32. Allow Sii Gargaar
Y. B. Xirsi
 33. Xaqu Ha U Bidhaamo
Amin A. Ahmed
 34. Ka Caymi Bohosha Naarta
Amin A. Ahmed
 35. Bilaash Cafiskaba Laguma Hanan
Amin A. Ahmed
 36. Jidkaa Baas Ka Soo Celi
Amin A. Ahmed
 37. Injiilka Haddaanad Baran
Amin A. Ahmed
 38. Silac Waw Bareeray
Amin A. Ahmed

- 
39. Ha U Beer Nuglaanina
Amin A. Ahmed
40. Intaan La Afuufin Buunkase
Amin A. Ahmed
41. Bishaaradaan Haatan Sido
Amin A. Ahmed
42. Xil Wayn Baydin Saarane
Amin A. Ahmed
43. U Bayaani Leeyahay
Amin A. Ahmed
44. Miyaad Ka Baqayn Qiyaamaha
Amin A. Ahmed
45. Kama Baxo Ilaahay
Amin A. Ahmed
46. Baaquse Wuxuu Yahay
Amin A. Ahmed
47. Bal Gudo Waajibkaa Ku Saaran
Amin A. Ahmed
48. Ii Bogsiiyay Laabtaba
Amin A. Ahmed
49. Bah Weynta Walaalaha
Abwaan A. K. Q. Dictionary
50. Boqoroow Ilaahay
Y. B Xirsi

-
51. Waa Bushaaree
Abwaan A. K. Q. Dictionary
52. Liibaantu Taallaa
Amin A. Ahmed
53. Tubta Lagu Hodmee
Y. B. Xirsi
54. Kan Naftiisa Iga Jecel
Amin A. Ahmed
55. Haddaan Jirraabadda Galo
Amin A. Ahmed
56. Inuu Kula Jiro Masiixii
Amin A. Ahmed
57. Masiixaan U Jidbaysanaayow
Amin A. Ahmed
58. Janadaynu Tagaynaa
Abwaan A. K. Q. Dictionary
59. Jaliil Baa Na Caawiya
Abwaan A. K. Q. Dictionary
60. Eebbow Adi Iga Xijaab
Amin A. Ahmed
61. Xorse Waxaa Ka Dhiga Kara
Amin A. Ahmed
62. Xog Sugaan Ciiseba Ka Haynin
Amin A. Ahmed
63. Xishoodka Ogaada
Abwaan A. K. Q. Dictionary

- 
64. Alloow Xerta Guusha Sii
Y. B. Xirsi
65. Dadkaa Jiree Maanta Nacaya
Amin A. Ahmed
66. Waxaan Dadkaa Ku Oran Lahaa
Amin A. Ahmed
67. Marna Yuu Ku Duufsanin
Amin A. Ahmed
68. Deelqaafkii Waan Nacay
Amin A. Ahmed
69. Garta Waa Dantiinnee
Amin A. Ahmed
70. Sayidkii I Doortay Baad Tahay
Amin A. Ahmed
71. Ku Dadaala Weligiin
Amin A. Ahmed
72. Dariiquna Ciise Weeyaan
Amin A. Ahmed
73. Ruuxse Waxaa Dullayn Kara
Amin A. Ahmed
74. Nuur Baa Ka Daalacay
Amin A. Ahmed
75. Docduu Masiixu Kaa Jiro
Amin A. Ahmed

-
76. Ugu Duceeya Iyaguna
Amin A. Ahmed
77. Doondoona Weligiin
Amin A. Ahmed
78. Xaqana Diidaaya Yeelkii
Amin A. Ahmed
79. Amar Lay Faray Dartii Baa
Amin A. Ahmed
80. Haddaanse Loo Noqon Diyaar
Amin A. Ahmed
81. Weligaa I Daadihi
Amin A. Ahmed
82. Kala Doorro Labadaas
Amin A. Ahmed
83. Ogow Damaceeda Waalani
Amin A. Ahmed
84. Duntuna Iigu Kaa Xirnaato
Amin A. Ahmed
85. Rumaysta Ereyga Fiican
Abwaan A. K. Q. Dictionary
86. Digriga Rabigaan
Abwaan A. K. Q. Dictionary
87. Dariiqaa Masiix
Y. B. Xirsi

-
88. Daa'imow Ilaah
Y. B. Xirsi
89. Illayn Waa Rafiiq La Hubo
Amin A. Ahmed
90. Rayn-Rayn Baan Ku Noolaan
Amin A. Ahmed
91. Rabbigu Waa Aaminee Garo
Amin A. Ahmed
92. Rajadu Way Dhawdahayee
Amin A. Ahmed
93. Adigaa Jacayl Run Ah
Amin A. Ahmed
94. Ruuxdaydii Dhimataad
Amin A. Ahmed
95. Waa Sire Iblayskuye
Amin A. Ahmed
96. Ku Sii Suga Madigii Eebbe
Amin A. Ahmed
97. Sidee Loo Fidin Injiilka
Amin A. Ahmed
98. Sayidkeena Fiican
Abwaan A. K. Q. Dictionary
99. Saacadduu Yimaad
Y. B. Xirsi
100. Dhiiggaagii Ii Shubay
Amin A. Ahmed

-
101. Haddaanad U Dhalan Mar Kale
Amin A. Ahmed
 102. Dhigashada Kitaabkiyo
Abwaan A. K. Q. Dictionary
 103. Dambigi Wuu Naga Dhaqoo
Y. B. Xirsi
 104. Ruuxduba Cabid Kuma Korayso
Amin A. Ahmed
 105. Waase Xaajo Culus
Amin A. Ahmed
 106. Culimo Baas Oo Xaqdiid Ah
Amin A. Ahmed
 107. Iftiin Ku Casuumi Doonnaa
Amin A. Ahmed
 108. Caqli Laawahaan Garan
Amin A. Ahmed
 109. Wuxuu Ciise Nooga Sii Digay
Amin A. Ahmed
 110. Dafiraadda Ciisaa
Amin A. Ahmed
 111. Inaan Ciido Haatan Waa Daw
Amin A. Ahmed
 112. Ciisaa Bogsiiyey
Abwaan A. K. Q. Dictionary
 113. Hadal Ciise Yiri

Y. B. Xirsi

114. Codsii Baan Sidaa
Y. B. Xirsi
115. Anigu Kama Gaabin Doono
Amin A. Ahmed
116. Waxaan Hubaa Geeri Dabadeed
Amin A. Ahmed
117. Maantaba Gob Baan Ahay
Amin A. Ahmed
118. Weligaa I Garab Qabo
Amin A. Ahmed
119. Kuwaa Gaalobay Oo Idil
Amin A. Ahmed
120. Adoon Gees Kale U Leexan
Amin A. Ahmed
121. Gocondhada Iyo Sarreenku
Amin A. Ahmed
122. U Gunto Hawlihii Masiixu
Amin A. Ahmed
123. Galladdii Ay Hanteen Darteed
Amin A. Ahmed
124. Masiixiyaddu Waa U Guul
Amin A. Ahmed
125. Xaqa Inay Gartaane
Amin A. Ahmed

-
126. Gogoshii Badbaadada
Amin A. Ahmed
127. Guullow Marna Kuma Farxaysid
Amin A. Ahmed
128. Gaalnimo Ka Xoroobay Maanta
Amin A. Ahmed
129. Inuu Go'ay Ha Moodina
Amin A. Ahmed
130. Guullow Ilaah
Y. B. Xirsi
131. Faafiyoo U Sheegoo
Abwaan A. K. Q. Dictionary
132. Qudduusnimo Ku Sii Joog
Amin A. Ahmed
133. Masiix Soo Qaabiloo
Y. B. Xirsi
134. Wada Qira Ilaah
Y. B. Xirsi
135. Cashar Weeye Qaaliya
Y. B. Xirsi
136. Qora Oo Adkeeya
Abwaan A. K. Q. Dictionary
137. Kaniisaddii Masiixee
Amin A. Ahmed

-
138. Kuraygaagii Baan Ahay
Amin A. Ahmed
139. Qofka Hela Kitaabkaas
Abwaan A. K. Q. Dictionary
140. Intaad Rabbi Kaashataan
Y. B. Xirsi
141. Korreeyoow Masiix
Y. B. Xirsi
142. Xaqu Igu Linkaxan Yahay
Amin A. Ahmed
143. Marti Iyo U Ahay Magan
Amin A. Ahmed
144. Dembiiliyo Mid Daahira
Amin A. Ahmed
145. Ma Huraankii Baad Tahay
Amin A. Ahmed
146. Mas'uuliyad Baa Ku Saarane
Amin A. Ahmed
147. Magacaaga Sharafta Wayn Leh
Amin A. Ahmed
148. Cid Kastoo Muraad Ka Leh
Amin A. Ahmed
149. Ayaan Mugdigii Ka Baxay
Amin A. Ahmed
150. Kuwa Nebiyada Is Mooday

Amin A. Ahmed

151. Rabbiga Mahaddiisa Weeyaan
Amin A. Ahmed
152. Maantana Nimcadaan Ku Jiro
Amin A. Ahmed
153. Kolkaa Bay Muuqan Doontaa
Amin A. Ahmed
154. Qiyaamaha Markii La Gaaro
Amin A. Ahmed
155. Munaafaqnimadu Waa Halis
Amin A. Ahmed
156. Mahasanid Masiix
Y. B. Xirsi
157. Nasiibse Waxaa Leh Maanta
Amin A. Ahmed
158. Haw U Nuglaanin Abidkaa
Amin A. Ahmed
159. Injiilku Naruuro Weeyaan
Abwaan A. K. Q. Dictionary
160. Nimcaaloow Masiix
Y. B. Xirsi
161. Warmo Haygu Gooddiyin
Amin A. Ahmed
162. Wax Walba U Wakiilo Eebbe

Amin A. Ahmed

163. Intaan Waqtigu Naga Lumin
Amin A. Ahmed
164. Wadaad Xume Ka Sii Roor
Amin A. Ahmed
165. Injiil Baan Wadaaye
Amin A. Ahmed
166. Anigu Waan U Adeegi Doonaa
Amin A. Ahmed
167. Ruux Ciise Weheshaday
Amin A. Ahmed
168. Eebbena Ka Waraabin Doonaa
Amin A. Ahmed
169. Wuxu Sheegay Ciise
Abwaan A. K. Q. Dictionary
170. Masiixii I Helay Baa
Amin A. Ahmed
171. Wadaaddadan Hallawsani
Amin A. Ahmed
172. Kaniisadda Hareer Mari
Amin A. Ahmed
173. Haddaba Aan Masiixa Eegno
Amin A. Ahmed
174. Ku Hungoobi Mayside

Amin A. Ahmed

175. Xaqa Kama Habaabo
Amin A. Ahmed
176. Marnaba Inuu Hungoobayn
Amin A. Ahmed
177. Haatanba Qiro Baraarkii Eebbe
Amin A. Ahmed
178. Haan Iyo Haruubkeed
Amin A. Ahmed
179. Kaniisaddu Waanay Huraynee
Amin A. Ahmed
180. Hoggaanshihii Naftaydow
Amin A. Ahmed
181. Bal Yaa La Hadloo U Sheega
Amin A. Ahmed
182. Hubaal Guul Baynu Gaadhi
Abwaan A. K. Q. Dictionary
183. Masiix Baad Ka Heli
Y. B. Xirsi
184. Yaahuu Intaan Iri
Amin A. Ahmed

HORDHAC

Buuggani waa kii afaraad (volume 4) ee taxanaha Maansada Masiixa oo sanadkiiba mar soo baxa. Maansada halkan ceegaagta waxaa ku soo farayaraystay maansooleey Soomaaliyeed oo ka tirsan xerta Sayid Ciise Masiix oo kala deggan dunida daafaheeda. Mahad badan yaan u jeedinaynaa abwaanada xilka iska saaray in ay dhaxal suugaaneed oo waara uga tagaan kiniisadda Soomaaliyeed. Xerta Soomaaliyeed ee Sayid Ciise Masiix waxaa ka mid ah suugaan yahanno miisaan leh oo hibo aftahannino lagu yaqaan. Xaqiiqda sheegashadan waxaad ka heli kartaa sugaanta qotada dheer ee buuggan ku miisan.

Dhaqanka Soomaalida waxaa lagu yaqaan in maansadu u tahay tiir qiima badan. Hadalka lagu sheego tiraabta waxaa ka awood badan kan tixda lagu cabbiro. Qiyaastii 33% Kitaabka Qudduuska ah qoraaladiisu waxay u dhigan yihiin hab suugaaneed. Qur'aanka oo dhammina waxaa uu u qoran yahay hab suugaaneed waana sababta ay dad badani oo aan aqoon afka Carabiga ay u awoodaan in ay xifdiyaan Qur'aanka oo dhan. Sidaas darted, suugaanta waxaa lagu sheegaa luqad gooni oo xagga Eebbe ka timaad oo dadka oo dhamina ay ka siman yihiin jacaylkeeda.

Fahamka aan fahamsanahay kaalinta suugaantu ku leedahay dhaqanka Soomaalida iyo marxabada loo wada qabo ayaa igu dhalsay fikirka ah in aan aasaaso taxanahan loo yaqaan Maansada Masiixa sannadku markuu ahaa 2020. Dhiirigelin wayn ayay ii ahayd markii xerta Soomaaliyeed ee Sayid Ciise Masiix iyo walaalaha ajnabiga ah ee la shaqeeyaa ay si kal iyo laab leh u soo dhaweeyeen taxanahan. Faa'iidooyinka taxanahan laga heli karo waxaa ka mid ah in uu noqdo meel lagu kaydiyo suugaan badan oo diini ah oo aan ku kaydsanayn meel kale. Waxaa iman xilli aan fogayn oo dhammaan suugaanta taxanahan cod ahaan loo duubi doono inta la saaro laxan iyo muusik aad u macaan.

Waxaan ku casuumaynaa dhammaan Masiixiyiinta Soomaaliyeed ee hibada u leh curinta suugaanta in ay qasiiddooyin u soo diraan taxanahan si loogu ban dhigo dadka u baahan in ay ka faa'iidaystaan. Waxaan si rasmi ah halkan uga mahadnaqaynaa maansoolayda soo gaarsiisay taxanahan suugaanta mugga leh ee uu Eebbe ku barakayn doono dad aad u badan. Waxaan Eebbe uga baryayaa suugaanlaydaas in uu ajar iyo xasanaad ka siiyo howsha wanaagsan oo ay u qabteen Boqortooyada Eebbe. Ciddii suugaan u soo diraysa taxanahan waxay innoo soo marsiin karaysaa amazingwisdom@gmail.com.

Aweis A. Ali

QIRASHADA IIMAANKA

Waxaan rumaysannahay Eebbaha Aabbaha ah
Kaas oo ah Qaadirka abuuray samada iyo dhulka
Iyo Ciise Masiix oo ah Inankiisa qura iyo Sayidkeena
Kaas oo ka dhashay Ruuxa Qudduuska ah
Waxaana dhashay Maryan oo bikra ah
Waxaa uu ku hoos silcay Bontiyos Bilaatos
Iskutallaabta ayaa lagu qodbay, wuu geeriyooday, lana aasay
Wuxuu galay Goobtii Dadka Geeriyooday
Kuwii dhintay ayuu ka soo sarakacay maalintii saddexaad
Wuxuu aaday samada oo uu ku negaaday isaga oo ku sugan
Gacanta midig ee Eebbaha Aabbaha Qaadirka ah
Halkaas ayuuna ka iman doonaa si uu u xukumo
Kuwa nool iyo kuwa dhintayba.
Waxaan rumaysannahay Ruuxa Qudduuska ah
Kiniisadda Ciise Masiix ee caalamiga ah
Jameecada awliyada ah, cafinta dembiga
Sarakicidda jirka iyo nolosha weligeed ah

Waxaa Turjumay Aweis A. Ali

U DUCAYNTA KUWA EEBBE U ADEEGA

Eebboow Ilaahow, kuwa aad u yeertay
In ay Eraygaaga, Soomaalida u geeyaan
Ku adeecay adigee, ammarkaaga raacay
Howshu waa mid adagoo, sahal aan ahayne
Afka waxay ka doonaan, uurka uga baahdaan
Eebboow Allaw sii, adey kuu adeegaan

Agab waxay u baahdaan, yaaney waayin Eebboow

Ka ilaali cuduroo, caafimaad adigu sii

Cidla yaanay aragoo, abidkood ay ciishoon

Ehel iyo asxaab sii, halkii ay tagaanba

Afka markay furayaan, hadal adigu oo hag

Axadkii maqlaaba, ha raaco Injiilka

Kuwa Eraygaaga, raaca oo rumeeya

Oo towbad keena, bartana Injiilka

Waa xertaadi adigee, garabkood Allow gal

Ka xijaab shar oo idil, oo ku xooji Ruuxa

Miro badan Allow sii, ku addeeca adigoo

Eraygaaga baraya, Soomaali oo idil

Waxaa curiyay Aweis A. Ali

BARYADA RABBIGA

Matayos 6:9-13

Aabbahayaga jannada ku jiroow, magacaagu quduus ha ahaado. Boqortooyadaadu ha timaado, doonistaada dhulka ha lagu yeelo sida jannada loogu yeelo. Kibis maalin nagu filan, maanta na sii. Oo naga cafi qaamahayaga sidaannu u cafinnay kuwa noo qaamaysan. Oo jirraabadda ha noo kaxaynin, laakiin sharka naga du. Waayo, boqortooyada iyo xoogga iyo ammaanta adigaa leh weligaa. Aamiin.

SABUURKII NEBI DAA'UUD

Sabuur 23:1-6

Kanu waa sabuur Daa'uud tiriyey.

Rabbigu waa adhijirka i jira; waxba u baahan maayo.

Wuxuu i fadhiisiyaa doog qoyan dhexdiis,
Oo wuxuu ii hoggaamiyaa biyaha deggan dhinacooda.
Naftayda wuu soo celiyaa.

Oo magiciisa aawadiis wuxuu igu hor kacaa waddooyinka xaqnimada.
In kastoo aan ku dhex socdo dooxada hooska dhimashada,
Sharna ka baqi maayo, waayo, waad ila jirtaa,
Ushaada iyo hangoolkaaga ayaa ii raaxeeya.
Cadaawayaashayda hortooda waxaad iigu diyaarisaa miis,
Oo saliid baad madaxayga ku subagtaa, koobkayguna waa buuxdhaafaa.
Hubaal cimrigayga oo dhan waxaa i raaci doona wanaag iyo naxariis,
Oo weligay guriga Rabbiga ayaan degganaan doonaa.

TOBANKA AMAR EE NEBI MUUSE

Baxniintii 20:3-17

Aniga mooyaane ilaahyo kale waa inaanad lahaan.

Waa inaanad samaysan sanam xardhan, ama wax u eg waxa samada sare jira, ama waxa dhulka hoose jira, ama waxa biyaha dhulka ka hooseeya ku jira. Waa inaanad iyaga u sujuudin, ama u adeegin, waayo, aniga oo ah Rabbiga Ilaahaaga ah waxaan ahay Ilaah masayr, oo xumaantii awowayaasha waxaan soo gaadhsiinayaa carruurtooda tan iyo farcanka saddexaad iyo kan afraad oo kuwa i neceb, oo waxaan u naxariistaa kumanyaal ah kuwa i jecel oo amarradayda xajiya.

Waa inaanad magaca Rabbiga Ilaahaaga ah si been ah ugu hadal qaadin, waayo, Rabbigu eedlaawe u haysan maayo kii magiciisa si been ah ugu hadal qaada.

Xusuuso maalinta sabtida, inaad quduus ka dhigto. Lix maalmood waa inaad hawshootaa, oo aad shuqulkaaga oo dhan qabsataa, laakiinse maalinta toddobaad waa maalin sabti u ah Rabbiga Ilaahaaga ah, oo waa inaanad shuqul qaban, adiga, ama wiilkaaga, ama gabadhaada, ama addoonkaaga, ama addoontaada, ama xoolahaaga, ama qariibka irdahaaga ku jira; waayo, Rabbigu lix maalmood buu ku sameeyey samada, iyo dhulka, iyo badda, iyo waxa dhexdooda ku jira oo dhan, kolkaasuu nastay maalintii toddobaad, sidaas daraaddeed ayaa Rabbigu u barakeeyey maalintii sabtida ahayd oo quduus uga dhigay. Aabbahaa iyo hooyadaa maamuus, in cimrigaagu ku dheeraado dhulka Rabbiga Ilaahaaga ahu ku siiyo.

Waa inaanad qudh gooyn.

Waa inaanad sinaysan.

Waa inaanad waxba xadin.

Waa inaanad deriskaaga marag been ah ku furin.

Waa inaanad damcin guriga deriskaaga, waa inaanad damcin naagta deriskaaga, ama addoonkiisa, ama addoontiisa, ama dibigiisa, ama dameerkiisa, ama waxa deriskaagu leeyahay oo dhan.

KITAABKA QUDDUUSKA AH IYO MAANSADA

Rabbiga gabay cusub ugu gabya,

Dadka dhulka oo dhammow, Rabbiga u gabya.

Rabbiga u gabya, oo magiciisa ammaana,

Oo badbaadintiisana muujiya maalin ka maalin.

Ammaantiisa quruumaha dhexdooda ka sheega,

Oo shuqulkiisa yaabka badanna dadyowga oo dhan ka dhex sheega.

Sabuur 96:1-3

Rabbiga gabay cusub ugu gabya,

Waayo, isagu wuxuu sameeyey waxyaalo yaab badan,

Gacantiisa midig iyo dhudhunkiisa qudduuska ahuna waxay keeneen badbaado.

Rabbigu wuxuu dadka ogeysiiyey badbaadadiisii,

Oo xaqnimadiisiina wuxuu bayaan ugu muujiyey quruumaha hortooda.

Oo wuxuu soo xusuustay naxariistiisii iyo aaminnimadiisii uu u qabay reerka binu Israa'iil,

Dadka dhulka darfihiisa jooga oo dhammu way wada arkeen badbaadinta Ilaaheenna.

Inta dhulka joogta oo dhammay, Rabbiga farxad ugu qayliya,

Dhawaaqa, oo farxad ku gabya, oo ammaan ku gabya.

Rabbiga ammaan ugu gabya idinkoo kataarad haysta,

Kataarad iyo codka heeska ugu gabya.

Boqorka Rabbiga ah hortiisa farxad kaga dhawaajiya

Turumbooyin iyo buunan.
Badda iyo waxa ka buuxaaba ha guuxeen,
Dunida iyo kuwa dhex deggan oo dhammuna ha dhawaaqeen,
Webiyadu ha sacbiyeen,
Oo buuruhuna dhammaantood farxad ha kaga gabyeen Rabbiga hortiisa,
Waayo, isagu wuxuu u imanayaa inuu dhulka xukumo,
Wuxuu dunida ku xukumi doonaa xaqnimo,
Dadyowgana caddaalad.

Sabuur 98:1-9

...laakiinse Ruuxu ha idinka buuxsamo. Iskula hadla sabuurro iyo heeso ammaan ah iyo gabayo xagga ruuxa, idinkoo gabyaya oo Rabbiga qalbigiinna ka ammaanaya.

Efesos 5:18



A



AFKAYGU KA DAALIMAAYO

Amin A. Ahmed

Anigu eedihii an galay
Dembigaan oogada ku siday
Allihii iga saamaxaa
Raxmaddiisa aawadeed
Iftiin igu soo hagoo
Injiilkana igu badbaadshay

Adduunka intaan dul joogo
Masiixa inaan ammaano
Alxamdulillaah iraaqdo
Afkaygu ka daalimaayo

Agoonnimo waan ka baxay
Waxaan helay Aabbe nool
Intuu ii galay abaal
Weliba goor iyo ayaan
Intaa i ilaalinaayoo
Shar iyo xumo igaba awday

Adduunka intaan dul joogo
Masiixa inaan ammaano
Alxamdulillaah iraaqdo
Afkaygu ka daalimaayo

HADDAAD USHA ADIGU II QABAN

Amin A. Ahmed

Ilayskiyo nuurkan ii baxay
Adaa igu hagay iftiinkoo
Weliba dhegahiyo indhaha
Iyo qalbigaygii awdnaa
U furay irdihii aqoontee

Haddaad usha adigu ii qaban
Injiilkana aad i barin
Inaad tahay Gabankii Eebbe
Anigu abid maan badbaadeen
Adaase mahaddaa iska leh

Imaan aan barax lahayniyo
Awood aan kala dhantaallayn
Iblays ku horjoogsan karo
Adaa jacaylkaaga aawgii
Abaal iiga dhigay Rabbow

Haddaadse urugadii aan qabay
Amaba eedihii aan galay
Adigu oogada ku raran
Imminka ambad baan ahaan lahaa
Adaase ii arxamay mar hore

U KAALAYA CIISE EEGGABA

Amin A. Ahmed

Shaydaan baa olole qaaday
Seeftana horay ugu afaystay

Inuu intuu lumin karaayo
Si ay u rumaynin Eebbe
Jidkaa xaqa ahba ka awday

Wuxuu sida awrta oo kale
Rartaa uu ugu adeegtaa
Ruux kastoo aaminay isaga
Amarradiisana addeecay

Adduun layskuma halleeyo
Illayn waa labo ayaamood
Aadamahow maqal warkaygoo
U kaalaya Ciise eeggaba

Inkaar weli waxay duljoogtaa
Kuwaa quursaday Injiilkoo
Garaad li'i aawadeedna
Intay inkireen Masiixaba
Aakhiro janno naawilaaya

Waxayse ogayn iyagu
Kolkay noloshani idlaato
Inaan Inankaba la'aantii
Cidina Aabbaha u tegi karin

Adduun layskuma halleeyo
Illayn waa labo ayaamood
Aadamahow maqal warkaygoo
Ukaalaya Ciise eeggaba

HUBKIYO AALADDAAD I SIISAY

Amin A. Ahmed

Aniga oon lahayn itaal
Inaad gooriyo ayaanba
Naftayda awood u yeesho
Inay iimaan lahaatoo
Si waafi ah kuu addeecdo

Iblayskana uga adkaado
Hubkiyo aaladdaad i siisay
Adaan kaaga hayaa abaal

Eebow Boqortooyadaada
Amaanada intaanba sido
Inaan u adeego weeyee
Aqooniyo xikmad aan gurin
Allow iigu deeq adigu

Aroorta haddii aan kufo
Intaad i tiraa istaag
Ayaad uurkiyo qalbiga
Nabadda udub uga dhigtaa

Kolkaas intaan aayar kaco
Xaggaaga u soo ordaa
Amaan kuula soo galaa

Eebow boqortooyadaada
Amaanada intaanba sido

Inaan u adeego weeyee
Aqooniyo xikmad aan gurin
Allow iigu deeq adigu

QAAR ABAAL LAHAYNOO
Amin A. Ahmed

Waxaa ku jira aadmiga
Qaar abaal lahaynoo
Iyaga oo dembiile ah
Aan aqbalin Masiixii
Iskutallaabta iyo silac
Aawadood u soo maray

Waana kuwo iblaysku
Albaabkii jannada iyo
Nimcadaba ka awday

Allahaa awoodda leh
Ee abuuray koonkiyo
Inta uun dul saarani
Qaar inkiraya baa jira
Intay engegtay laabtii
Indho li'i u dheer tahay

Waana kuwo adduunyadu
Addimada ka dabartoo
Illawsanba qiyaamaha

SOO JEEDA IDILKIIN

Amin A. Ahmed

Adduunyadan la joogo
Afarteeda waaxood
Colaadhan ekeeyoo
Meel kastaba ka oogani

Waw astaamo aadmiga
Ugu filan ogaanshaha
Imaatinkii Masiixee

Masaalkii Injiilkoo
Ka hadlayay arooskoo
Ciise noo iftiinshay
Intaad hoos u eegtaan
Soo jeeda idilkiin

Imminkadan lafteedu
Inuu ardaaga joogoo
Ka fogayn albaabkaba
Waa arrin hubaal ah

Waana in loo arooraa
Soo dhawayn abaabulan
Iimaanna lagu laray

Waxaa loo ordaayoo
Loo ooman yahay waa
Ayaantaa uu soo noqn
Ciise inaan la kulannee
Heegan u sii ahaada

ABAAL WUXUU KAAGA SII DHIGAY

Amin A. Ahmed

Haddaad oggoshahayba Ciise

Runtii inuu adiga awgaa

Intuu dhimashadii aqbalay

Dembigoo idil kaa cafiyay

hubaal adduunyada dusheeda

Inaad ku liibaantay aamin

Kolka aakhiro la gaarana

Abaal wuxuu kaaga sii dhigay

Weligeed nolol aayatiin leh

Iblays dadka xaqa ka iiliyay

Dunidaad u ahayd addoon

Haddaad imminkase xor tahay

Masiixaa mahaddaa iska leh

Adoo ambad ahba ku helay

Injiilkana kugu wacdiyay

Kolka aakhiro la gaarana

Abaal wuxuu kaaga sii dhigay

Weligeed nolol aayatiin leh

ANNAGU U DIYAARSAN NAHAY

Amin A. Ahmed

Adaa nagu yiri Injiilka

Gaarsiiya adduunka oo dhan

Si uu idilkiiba aadmigu
Gudcurka uga soo ordoo
Iftiinkana ugu yimaaddo

Rabbow saad adigu jeceshahay
Inaan amarkaa u fulinno
Ayaan goor iyo ayaanba
Annagu u diyaarsan nahay

Inaan midnimada adkaynoo
Dhammaan isu uur furnaanno
Jacaylna isugu adeegno
Adaa nagu wada ilhaanshoo
Runtana uurkayaga ku beeray

Rabbow wax kastood ishaartay
Maantaan intifaacsannaaye
Annagoo dhanba oofintoodii
Marnaba kama iilan doonno

BELO QABE IBLAYSOW
Amin A. Ahmed

Belo qabe Iblaysow
Adaan kula hadlaayee
Aayar ii dhegayso

Mid inkaaran baad tahay
Oo Allihii abuuray
Diiday inuu addeecoo

Isla wayni awgeed
Xaqii uga irdhoobay

Magacaa awoodda leh
Ee Gabankii Eebbe
Anoo kaashanaayaan
Iska kaa eryaayaa
Orod iga tag orod

Xaawoo noo ayeeyo ah
Iyo Aadam baad shalay
Ku afuuftay waxaan jirin

Iblays yahaw agtaydana
Kuma lihid itaal aad
Igu ambin karaysee
Ku astayso laabtaba
Inaan abid ku raacayn

Magacaa awoodda leh
Ee Gabankii Eebbe
Anoo kaashanaayaan
Iska kaa eryaayaa
Orod iga tag orod

RUNTII USHA MIDAAD U HAYSO

Amin A. Ahmed

Haddii aanad ina belaayo
Agtiisa iga soo kaxaynin
Weliba eedihii aan galay

Adigu aanad iga dulqaadin

Miyaan arki lahaa nimcadaan
Injiilku xambaarsan yahay

Runtii usha midaad u hayso
Ayaa aakhiriyo adduunba
Liibaan ku adeeganaayoo
Shar oo idil laga fogeeyay

Iftiinkaad dunida keentay
Aadmiga ku badbaadinaysay
Haddaanad igu soo ilhaamin
Jacaylna aad igu anqarinin

Miyaan abid aqoonsan lahaaba
Inaad tahay Gabankii Eebbe

Runtii usha midaad u hayso
Ayaa aakhiriyo adduunba
Liibaan ku adeeganaayoo
Shar oo idil laga fogeeyay

IFTIINKAANSE HELAY BAA
Amin A. Ahmed

Ciise haddaan aqbali lahayn
Iimaan dhab ah ma yeesheen
Kii indhaha i tiray baan
Joogi lahaa agtiisoon
Naarta ehel u noqon lahaa

Iftiinkaanse helay baa
Nuur igu dul oogoo
Amban maayo weligay
Waana mahad Ilaahay

Haddii aan Injiilkaba
Aayaadkiisa baran lahayn
Maan heleen awoodaan
Iblayskii i lumin jiray
Maanta kaga adkaadee

Imminkase waxaan ahay
Miduu Ilaahay doortoo
Aakhiro dhankeedana
Abaalmarin sugaaya

IIMAANKANA BAL II SIYAADI

Amin A. Ahmed

Runtii anigoo indhoole ah
I ambiyay Iblayskii baad
I keentay iftiinkan waynoo
Weliba eedihii aan galay
Intaad oogada ku qaadday
Rajiyo nolol ii abuurday

Rabbow ma illaawi karo
Inaad silac aan yarayn
U soo martay aawaday

Welina i ag joogto ood
Naftaydana ilaalinayso

Anigu intaan kaco allaylkii
Haddaan ilaa oogta waaberi
Uurkiyo afka kaa ammaano
In yar ood arxan ii gashiyo
Amaba abaalkaagii waynaa
Miyaan abid gudi karaayaa

Rabbow inaad tahay mid aamina
Aadmiga jacayl wayn u qaba
Aadaa igu baray Injiilkoo
Aqoontana i siiyay maantee
Iimaankana bal ii siyaadi

ABIDKAYBA KAAMA TEGAYEE

Amin A. Ahmed

Qalbiga waxaa ii iftiinsha
Rabbow waa erayadaadoo
Mar kasta uurka iiga yaalloo
Afkiyo carrabkaygii baray
Ammaaniyo mahadintaadee

Adiga inaan kuu hoggaansamo
Amarradaadana addeeco
Noloshayday udub u tahayoo
Abidkayba kaama tegayee

Anigu maalintaan aqbalay

Inaad tahay madigii Eebbe
Ilays ii baxay dharaartaa
Ayaa indhahaygii furayoo
Aqoon buuxdana i siiyay

Adiga inaan kuu hooggansamo
Amarradaadana addeeco
Noloshayday udub u tahayoo
Abidkayba kaama tegayee

RUMAYSADKU KELI AHAANTII

Amin A. Ahmed

Waa in sida Ibraahim oo kale
Iimaan kaamil ah la yeeshaa
Illayn isba ballantii Eebbe
In badan ayuu dhawri jirayee

Ilaa uu ka dhalay Isxaaqna
Kamaba uu shakin ayaan qurah
Inuu farcan badan awoowe
Isagu u ahaan lahaaba

Arrintaa waxay noo iftiimin
Rumaysadka keli ahaantii
Innaba inaan lagu badbaadayn
Haddeer intaad oogsataanba
Fuliya hawshii laydiin igmaday

Markuu Eebbe faray Ibraahim
Inankii uu aadka u jeclaa

Inuu ugu bixiyo awgii
Qurbaan allabari sidiisii

Isagoo oggoldiidba aan noqon
Ayu intuu amarkii qaatay
Isxaaq u kaxeeyay aaggii
Markii hore loo asteeyay

Arrintaa waxay noo iftiimin
Rumaysadka keli ahaantii
Innaba inaan lagu badbaadayn
Haddeer intaad oogsataanba
Fuliya hawshii laydiin igmaday

OGOW LAYS XISAABINAAYO

Amin A. Ahmed

Adigu ha is oran marnaba
Kollay cidi kuma arkaysee
Allaylkii intaad shar oogto
Aroorta ruux qumman sidiisii
Wanaag kaa jirinba uurka
Aadmiga afka hawga sheegin

Illayn Allehii ku uumaa
Waxaad fali eeganaayee
Qiyaame in loo aroori
Ogow lays xisaabinaayo

Injiilkii lagu igmaday
Haddaad oogada ku qaadin

Oo aanad gaarsiin adduunka
Runtana ku adeegi waydo
Erayga intaad been ka sheegto
Nebi baan ahay iska tiraahdo

Illayn Allehii ku uumaa
Waxaad fali eeganaayee
Qiyaame in loo aroori
Ogow lays xisaabinaayo

ABAALGUD MA WAAYI DOONTID

Amin A. Ahmed

Kolkaad Allehii ku uumay
Dad awgii u caabudayso
Inaad iimaan lahayn bay
Astaan u noqon middaasu

Haddaad oggoshahay Masiixa
Inuu yahay Gabankii Eebbe
Afkaaguse aanu qiranayn
Ogow inuu rumaysadkaagu
Sidii aqal tiir lahayn yahay

Adigoon ka filaynin aadmiga
Naftaadu inay ammaanaan
Ilaah runta ugu adeegoo
Abaalgud ma waayi doontid

Haddaadse adduun raacdo
Qiyaamana aad illowdo

Waxaa ku addoonsan doono
Waxii uurkaagu jecel yahay
Agtaada kuba wayn iyagu

OGOW WAX KASTOO AAN BARINNO

Amin A. Ahmed

Haddaynu arlada dusheeda
Heshiis ku ahaanno abidkeen
Ogow wax kastoo aan barinno
In Eebbaha wayn agtiisana
Laga soo wada ajiibi doono

Waxayse arrintaa ku curan
Kolkaan la nimaadno iimaan
Noqonno kuwo wada addeeca
Dhammaan amarrada Ilaahba

Rabbigu inuu yahay mid aamina
Haddaynu gooriyo ayaanba
Uurkiyo laabtaba ku hayno
Rumaysad astaantii leennahay
Marnaba amban mayno weligeen

Waxaase taa nagu ilhaamin
Aqoonteenna sare u qaadi
Injiilka waxaa ku qoran
Kolkaan eray eray u dhuuxno

SOO ORDOO U KAALAYA

Amin A. Ahmed

Haddaad eegto aadmiga

Qofba wuxuu u ololayn

Nolol aayo wacan leh

Inuu ku waaro abidkii

Balse waxay ogsoonayn

Eebbaheenna wayni

In agtiisa laga helo

Midaan idlaanin weligeed

Dadkaa waxaan ku oranlaa

Soo ordoo u kaalaya

Aawadiin Masiixii

Iskutallaab dusheedii

Ku oofsaday naftiisii

In badan baa adduunyada

U arkaba inay tahay

Aqal aan dumaynoo

Udubkiisu taagnaan

Waase kuwo ambad aho

Jiritaanka aakhiro

Urkaba ku haynoo

Dhimashada illawsane

Dadkaa waxaan ku oranlaa
Soo ordoo u kaalaya
Aawadiin Masiixii
Iskutallaab dusheedii
Ku oofsaday naftiisii

ABAALKAAD II GASHAY ALLAHAYOW

Amin A. Ahmed

Eebbaha naxariista badanow
Adaa anigoo ambad ahoo
Xaqaba irdihiisii garanayn
Runtii iga furay albaabkaan
Badbaadshaha ugu imaanlaa

Adaa iga mudan amaaniyo
Inaan mahad kaaga celiyo
Abaalkaad ii gashay Allahayow

Eebbaha koonkaba abuurow
Adaa jacaylkaaga awgii
Anoo eedihiyo dembiga
Weli ku xambaarsan oogada
Sharuud li'i ii aqbalayee

Adaa iga mudan amaaniyo
Inaan mahad kaaga celiyo
Abaalkaad ii gashay Allahayow

WAA INAYNU AHAANNO HEEGAN

Amin A. Ahmed

Haddaan amarrada Ilaahay
Siday yihiin loo addeecayn
Iimaan inuu meesha oollin
Rumaysadka udubkii uu jabay
Rumayste kastaa ogsoone

Ammaanadii aynu qaadnee
Ahayd baahinta Injiilka
Ayaa weli oofinteedii
Annaga laynaga sugaayee
Bal aynu axdigaa adkayno

Aadmiga qaarkii sidiisa
Addoomo inaan u noqonno
Waxaan abid sii jiraynin
Sow maaha inaan illownay
Xilkii Eebbeheen na saaray

Mar haddii la inoo igmaday
Inaan gaarsiinno eraygii
Dunida weli aan iftiinka
Arkayninoo gudcurku lumiyay
Waa inaynu ahaanno heegan

INTAAN WAQTIGU KAA LUMIN

Amin A. Ahmed

Ayaan wacan waxaa leh
Ruux intuu aqoonsaday

Allihii koonkan uumay
Haddana aaminaayoo
Amarradiisa oo dhami
U hoggaansan abidkii

Kaagan weli adduunyada
Iska daba ordaayow
Ogow inuu Masiixuba
Goor dhow uu imanayo
Siduu qoray Injiilkuna
Arrimuhu u dhacayaan

Intaan waqtigu kaa lumin
U adeeg Rabbigii shalay
Xaqa kugu ilhaanshay
Una ahaw mid daacada

Amban maayo weligii
Qofka nolosha oo idil
Isku-tallabta qaatee
Masiixa aawadiisna
Oggol inuu u maro silac
Inkaar iyo xanuun badan

Eedse waxaa xambaarta
Kaagan weli Iblayskii
Ehel iyo ka dhigan gacal
Runtii galladdii Eebbena
U muuqanin ayaamahan
Una arooray meel baas

Intaan waqtigu kaa lumin
U adeeg Rabbigii shalay
Xaqa kugu ilhaanshay
Una ahaw mid daacada

HAATAN INA MASIIXOO
Amin A. Ahmed

Immisaan adduunyada
Iska daba ordaayoo
Arki waayay galladdii
Loogu deeqay aadmiga

Immisay naftaydu
U ahayd addoon run ah
Shaydaankiyo Iblayskii
Ku adeegan jirayoo
Irdahaba ka soo xiray

Imminkase xor baan ahay
Kol haddaan aqoonsaday
Masiixii ixsaankiyo
Ii galay abaalkaba

Immisaan addeec li'i
Inkiraayay Ciisoo
Ambad aniga oo ah
Beeniyay Injiilkaba

Immisaan aqrisan jiray
Aayado ah dhalanteed
Oo nacayb abuurriyo
Ololaha jihaadkoon
Ahayn amarka Eebbe

Waase mahad Ilaahay
Kol haddaan ahaaday
Haatan ina Masiixoo
Iblays lumin karaynin

ADIGU HA KU WADA AMMAANEE

Amin A. Ahmed

Haddaanad Eebow jacayl
Dunida idilkeed u qabin
Anbiyo uma soo dirteen
Xaqaba u iftiimin jiray

In badan baanse weli ogayn
Inaad Inankaagii qurah
Qurbaan allabari sidiisii
Iyaga aawadood u bixisay

Allow naxariistihiiyow
Aadmigan lumayee Masiixa
Inkiray intaad soo hadayso
Adigu ha ku wada ammaaneen

Eebow inaad adigu jeceshahay
Inaanu midna ehelka naartaba
Ahaanin sidii Iblayska oo kale
Aqoon laawe baanan dhaadine

Qaar baase indhaha ka xiran
Oo ay dhegahoodii awdmeen
Xaqana ka ordaaya maantoo
Injiilkana u yeela iin jirin

Allow naxariistihiiyow
Aadmigan lumayee Masiixa
Inkiray intaad soo hadayso
Adigu ha ku wada ammaaneen

ADDOONIYO ADAA MID XORA

Amin A. Ahmed

Addooniyo adaa mid xora
U keenay Injiilka wacan
Si uu aadmigu dhammaan
Aabbaha ugu wada yimaad
Iblayskii hoggaamin jiray
Ushiyo ablay ula dhacaan

Aakhiro rajadaan sugaayiyo
Ifkani farxaddaan ku haysto
Inaan aawadaa ku helay
Ayaan aniguna qiraayoo
Adiga mahad kaaga celiyaa

Ifiinkiyo adaa mugdigii
Ummadda uba kala caddeeyay
Ilayskiyo nuurkii baxay
Dunida u ishaarayoo
Aqbala kolkii aad ku tiri
In badan xaqii wada ogaatay

Aakhiro rajadaan sugaayiyo
Ifkani farxaddaan ku haysto
Inaan aawadaa ku helay
Ayaan aniguna qiraayoo
Adiga mahad kaaga celiyaa

INAAD TAHAY INA BELAAYO

Amin A. Ahmed

Iblaysow inaan mar kale
Adiga kuu dhego nuglaado
Waa midaan abidkeed dhacaynoo
Inkaar qabaan kuu arkaayee

Illayn dabintaad awowgay
Iyo gelisay ayayday
Ayaan uurkaba ku haystaa
Oo aan weligay illaawayn

Inaad tahay ina belaayo
Innaba arxan aan lahaynoo
Aadmiga inaad lumiso mooyee
Ilaah u dhowaada oranayn

Horaan u ogaa anigu
Inaan ku addeeco daayee
Agtaada inaan imaaddo
Kollay waa midaan ahaanayn

WAA AMAANO CULUS

Amin A. Ahmed

Amarradii Masiixa
Waa inaan adkaynoo
Injiilkuu fidiya yiri
Ugu gayno aadmigu
Aagga uu ku nool yahay

Waa amaano culusoo
Idilkeen yar iyo wayn
Oogadeenna saarane
Mar kastaba ogaadaa

Kuwa ambadayee lumay
Iblayskuba dullaystay
U arxama dhammaantood
Iftiinkana u muujiya
Ayu Masiixu ina faray

Waa amaano culusoo
Idilkeen yar iyo wayn
Oogadeenna saarane
Mar kastaba ogaadaa

EEDLAawe IGA DHIGAY

Amin A. Ahmed

Arxankaaga badan baa
Runta igu ilhaanshoo
Xalay dhalay sidaan ahay
Eedlaawe iga dhigay

Ambadnimadii waa hore
Goortaan ka imid bay
Duniduba ogaatay
Inaan dhabtii abuur cusub
Loo bogay ahaaday

Kuwa aan aqbalin weli
Ciisow inaad tahay
Isha nolosha laga helo
Ayaan ugu duceeyaa
Inay gartaan Injiilkii

Abaalkaagii waynaa
Ma illaawi karayoo
Uurkiyo qalbiga buu
Iftiin haga u yahayee

Ayaantaan ku raacay
Isbeddelkay naftaydu
Oogada ku qaadday
Uunkaa wada dareemoo
Weli la amakaaksan

Kuwa aan aqoonsanin
Inaad Gabankii Eebbe
Tahay adigu Ciisow
Xaqa inaan u sheegaan
U ordaa hadiyo goor

AMAAN LOOW MASIIX
Y. B. Xirsi

Anigoo mugdigaa
God abeesa iyo
Masas ay galaan
Ku dhex aasanahay

Awoodloow Masiix
Yaa i caawiyoo
Iftiin ii bixiyo
Ii furay albaab

Amaan loow Masiix
Intaan galay dunuub
Iga maydhayoo
Noloshayda idil
Istreexsanahay

Waanu aaminoo
Eraygiisa wayn
Amarkuu nafaray
Yaan ilaalinaa

Injiilkaan sidnaa

Ummadeena iyo

Ehelkeeni baan

Ugu yeedhaynaa

Amaan loow Masiix

Intaan galay dunuub

Iga maydhayoo

Noloshayda idil

Istareex sanahay

AABBOOW ILAAHOOW

Y. B. Xirsi

Ilaahoow adduunyadan

Adigaa abuurtoo

Erygaagi aad tidhi

Ku ahaatay idilkeed

Inta noole ee jira

Arsaaqday cunaan iyo

Ka ilaalsha baahida

Abnigooda wada suga

Aabboow Ilaahoow

Addoon kaagi baan ahay

Anigoo dambiilaa

Adigaan ku tuugee

Aqbal noogu deeq badan

Amuuraha dhammaantood

Adaa maamulaayoo

Aadamuhu la'aantaa

Isma bixin karaayaan

Eeboow Ilaahoow

Baryadaydan eegoo

Awoodaada yaabka leh

Ruuxa Aabbo noo keen

Aabboow Ilaahoow

Addoon kaagi baan ahay

Anigoo dambiilaa

Adigaan ku tuugee

Aqbal noogu deeq badan

ANIGOO DAMBIILA AH

Y. B. Xirsi

Erayada Ilaahay

Uurkayga hoosiyo

Adhaxday ku yaaliin

Ifka intaan ku noolahay

Adeegiisa inan wado

Balantaydu ay tahay

Anigoo dambiila ah

Kii la ii musbaaree

Badbaadada i siiyoow
Mahadsanid Ilaahooow

Ifku waa ayaamoo
Axad kumaa hadhaayee
Ilaahiina wada qira

Xisaab aad u adag iyo
Oohin baa dambaysee
Ummad yahay Masiix qira

Anigoo dambiila ah
Kii la ii musbaaree
Badbaadada i siiyoow
Mahadsanid Ilaahooow

AARKA NOO KACAY
Abwaan A. K. Q. Dictionary

Abaal nin galoo
Oo adeegi
Waa Aweis oo
Waa amiir jira

Aarka noo kacay
Waa Aweis oo
Waa aqoon yahan
Alle noo diray
Agoontii shalay
Anfac weyduu

U arxamayoo
waa ileys baxay

Aarka noo kacay
Waa Aweis oo
Waa aqoon yahan
Alle noo direy
Abtirsiimiyo
Ehel iyo qolo
Aan anficin ummad
Ma amaanoo
Uma bogo abid

Aarka noo kacay
Waa Aweis oo
Waa aqoon yahan
Alle noo diray
Ardaydiisana
Aqoon iyo cilmi
Anfacaysuu
Abid siiyaa

Aarka noo kacay
Waa Aweis oo
Waa aqoon yahan
Alle noo diray
Amranaad tahay
Eebbe soo diray
Arligeenana
Eray barashada

Adaa anfacoo
U mariyay horay

Aarka noo kacay
Waa Aweis oo
Waa aqoon yahan
Alle noo diray
Abriskiyo cadaw
Allaan baryayaa
Inaad arag abid

Aarka noo kacay
Waa Aweis oo
Waa aqoon yahan
Alle noo diray
Allaan baryayaa
Albaabka janada
Aweis iyo xertu
In ay ku kulmaan
Aamiin wada dhaha
Ummadiiyey
Aabbo waakane

Aarka noo kacay
Waa Aweis oo
Waa aqoon yahan
Alle noo diray

ALLOW SII GARGAAR

Y. B. Xirsi

Awoodloow Ilaah

Ubadkaagi baa

La ugaarsadoo

Jeel aad u adag

Aayar lagu ritoo

Way ooyayaan

Umushii la qalay

Ilmahay dhashiyo

Xandi iyo Aster

Xadhig aanay gayin

Edeg lagu ritee

Allow sii gargaar

Arxan laawayaal

Aan garan xaqnimo

Na ugaadh sadaan

Aanka qayshanee

Aabboow Ilaah

Awoodaadi keen

Abuuroow Ilaah

Ubadkaagan xidhan

Eedda loo hayaa

Eraygaaga iyo

Gaadhsiin Ijiil

Waa adi dartaa

Aabboow sara kacoo

Eliiyaahna dabkii

Aad siisayee

Ciidan aad u badan

Ay ku baaba'een

Aabboow noogu deeq

Arxan laawayaal

Aan garan xaqnimo

Na ugaadh sadaan

Aanka qayshanee

Aabboow Ilaah

Awoodaadi keen

XAQU HA U BIDHAAMO

Amin A. Ahmed

Kolkay timid badbaadadi

Loogu baaqay aadmiga

Qaar diiday baa jira

Baadinimo ka doortaye

Iyagoo aan baran bay

Beeniyaan Injiilkiyo

Masiixii bogsiin lahaa

Bukaan liita weeyee

Allow nuurkan baxay iyo

Xaqu ha u bidhaamo

Badbaadshihii u soo degay

Basharkoo dhan awgii

Qaar badan ayaa nacay

Dhuuxin barakadiisii

Iblayskii barbaarshay

Beladuu ku beeray

Ayay weli u bogayaan

Bukaan liita weeyee

Allow nuurkan baxay iyo

Xaqu ha u bidhaamo

KA CAYMI BOHOSHA NAARTA

Amin A. Ahmed

Eebow Boqortooyadaada

Anigu maalintaan ku biiray

Ayaan ka baxsaday Iblaysku

Belaayaduu ila dul joogay

Qaar buuse weli sitaayoo

Been iyo dhalanteed ku sabayaa

Oo aan ku baraarugaynin

Inay xaqii baal mareenba

Rabbow waxaan kaa baryaa

Inaad iyaguna u baaqdood

Ka caymiso bohosha naarta

Haddaanad Barbaarkii Eebbow

Naftayda cadaab ka baajin

Runtana aad igu barbaarin

Xaqaba maan baran lahayne

Qaar baa baylahay Injiilkoo

Weliba been abuur ku sheegay

Shaydaan la bahoobayoo

Meel baas looga yeerayee

Rabbow waxaan kaa baryaayaa

Inaad iyaguna u baaqdood

Ka caymiso bohosha naarta

BILAASH CAFISKABA LAGUMA HANAN

Amin A. Ahmed

Bulshaa jirta weli ku andacoon

Boqorku kuma dhalanin mooro

Haddana barashada Injiilkana

Baahiba uma qabno tiraahdoo

Badbaadada timidba oggolayn

Waxay bah wadaagiin yihiinba

Kuwaa kalee xaqii ka bayroo

Bashar caadi ah waa yiraahda

Masiixii soo booqday dunidoo

Runtana u bayaanshay aadmiga

Bilaash cafiskaba laguma hanan

Xinjiro dhiig ahaa ku baxayoo

Beddelkooduna la heli karin

Qaarbaa weli Masiixa beenin

U bartay inay iska yiraahdaan

Cadaab dambe kama baqaynoo

Ibraahim kuwo ka beermiyo

Waxaan nahay beel la doortay

Waa kuwo weligood la baab ah

Dhamman kuwaa baadiyoobee

Oo ay weli beerka uga taal

Xisaabta berigaa qiyaamaha

Nebi bixin doona inuu jiro

Bilaash cafiskaba laguma hanan

Xinjiro dhiig ahaa ku baxayoo

Beddelkooduna la heli Karin

JIDKAA BAAS KA SOO CELI

Amin A. Ahmed

Qaar badan ayaa lumay

Xaqa beeninaayoo

Runtii ay ka bayreen

Baadinimo u haystoo

Dhalanteed u bogayee

Barqo qurah naftoodii

May rumayn Badbaadshaha

Mana bartaan Injiilkii

Boogahoodii dhayi lahaa

Wax dhan baan u baaqnaa

Mana beer jileecaan

Rabbow adaan ku barinnaye

Jidkaa baas ka soo celi

Kuwo aan is bixinayn

Oo bir adag Iblaysku

Uga xiray boqnaha baa

Dunidana dhex boodoo

Duul bedqaba is moodee

Xaqii loo bayaanshay

Maba beegsadaanoo

Nacasnimo ku beeran

Ayaa saartay buur dheer

Wax dhan baan u baaqnaa

Mana beer jileecaan

Rabbow adaan ku barinnaye

Jidkaa baas ka soo celi

INJIILKA HADDAANAD BARAN

Amin A. Ahmed

Injiilka haddaanad baran

Badbaadshaha kuba xirnayn

Iblays marna kaama bayroo

Inuu caasinimo ku bado buu

Weligii kuugu baaqayaayee

Gaashaan bira adoonba sidan
Kolkaad baylahdo naftaadaba
Cidladdu kugu baaba'shaayee
Illayn basar iyo aqoon dheer
Ma lihid kaga baxsan karayside

Haddaanad u bislayn cilmiga
Ogow bareyaasha hoogay
Amaba nebiyada ah beenta
Casharka ay bixinayaanba
Bohol buu kugu sii ridaayee

Wax kasta oo la soo bandhigo
Haddii aanad bayaan u garan
Aqoon buuxda aanad lahaynba
Kuwaa bidciyoobay waa hore
Umbaad la bahoobi doontaa

SILAC WAW BAREERAY

Amin A. Ahmed

Belo kastoo timaadiyo
Silac waw bareeray
Inaan baqdin daraaddeed
U beeniyo Masiixana
Kuma taal boggaygee

Bulshada horteedana

Bayaan baan ugu qiraa
Inuu bixiyahaygiyo
Ciise yahay Badbaadshaha
Barwaaqadan i siiyay

Barbaarshihii i doortay
Ballanqaadki noloshuu
Iigu deeqay beri hore
Ayaan beerka ku hayaa
Beegsadaa hadiyo jeer

Naftu way baxaysaa
Lamana baajin karayee
Kol haddaan badbaaday
Boqorkeenna wayn baan
Baryadiisa sii wadi

HA U BEER NUGLAANINA

Amin A. Ahmed

Bogsan maayo ruuxii
Cudurkii ku baahay
Xal u baadigoobayn

Kan baylahay naftiisoo
Intuu xaqii ka bayray
Hanuun dhaba u baahnayn
Ma badbaado weligii

Dadow baaba' iyo hoog
Iblayskaa idiin baday

Ha u beer nuglaaninee

U soo baxa iftiinkiyo

Barashada Injiilkaba

Dalag ruuxii beerto

Biyo haddaanu siinayn

Dhaqsuu uga ba'aayee

Kaan baraarugaynee

Naftiisana ku boorrinin

Inuu Ciise Boqor yahay

Burbur buu u noqon ehel

Bulsho yahay Iblaysku

Intuu bohosha naartaba

Aanu bartanka kuu gelin

Ka soo baxso shartiisoo

Badbaadshaha rumayso

INTAAN LA AFUUFIN BUUNKASE

Amin A. Ahmed

Haddaan kuwaa baadiyoobay

Runtiyo xaqa loo bidhaamin

Miyay weligood Badbaadshuhu

Inuu yahay bixiyehoodii

Bayaan u gartaan iyagu

Jawaabtu waa maya barbaaray

Intaan la afuufin buunkase

Baraaruga oo u wada kaca
Si loo baahin lahaa Injiilka

Iblaysku kuwii uu boobay
Haddaan la barin qorniinka
Badbaadadii loogu deeqiyo
Nimcadaan loogu baaqayaba
Miyay abidkood u bogayaan

Bulshoy waa maya jawaabtee
Boqorku inta aanu soo noqon
Intaad ku baxdaan dunida
Iftiinkana u soo bandhiga

BISHAARADAAN HAATAN SIDO

Amin A. Ahmed

Bilaash galladdaan ku helay
Anoon ka bakhaylin aadmiga
Beesiyo xoolaba ka rabin
Inaan ugu baaqo weeyaan

Badbaadada kuwaa dafiray
Mugdiga inay ka soo baxaanoo
Xaqana u gartaan bayaan
Ayaan ka baryaa Rabbiga

Intay naftu baaqi igu tahay
Inaan bar kastaba adduunyada
Ku baahiyo warka wanaagsan
Ayaan badwayn uga tallaabaa

Dhammaan kuwaa baadiyoobay
Bishaaradaan haatan sido
Bilkhayr in wada dhahaan baan
Boqorka ka rajaynayaayee

XIL WAYN BAYDIN SAARANE
Amin A. Ahmed

Qofba wixii uu beertuu
Berigaa xisaabtana
La hortegi Badbaadshaha
Xil wayn baydin saarane
Soo kacoo baraaruga

Injiilkii la idiin baray
Haddaad baahin waydaan
Bohol aad ku tuurtaan
Imaankiinu inuu buro
Miyaad kaba baqaynin

Bulsho yahay la doortaay
Boqortooyadaan dumin
Baaba'aynin weligeed
U soo bixiya miro wacan
Rabbiguna u bogi karo

Bal qabsoo rumaysad
Camal lagu barxaynin
Ruuxna kuma badbaadee
Ha baylihina hawlihii

Laydiin igmaday beri hore

U BAYAANI LEEYAHAY

Amin A. Ahmed

Bixiyaha la'aantiis
Cidna may badbaaddeen
Gallad lagu baraarana
Bilaash kuma timaaddeen

Anigu boogtii igu tiil
Ka bogsaday ayaantaan
Isu dhiibay Boqorkee

Waa bishaaro waynoo
U bayaani leeyahay
Inta baadiyawdee
Baal martay Masiixaba

Hadduu soo baqoolinoo
Soo booqan dunidaba
Qaar badan barwaaqiyo
Nimco kuma bariisteen

Anba haatan barakada
Burqanayso waxaan helay
Berigaan rumaystaye

Waa bishaaro waynoo
U bayaani leeyahay
Inta baadiyawdee
Baal martay Masiixaba

MIYAAD KA BAQAYN QIYAAMAHA

Amin A. Ahmed

Ogow booqashadii Rabbigu
Ugu soo baxay shalay adduunka
Waxay ahayd inuu bogsiiyo
Sidaada bukaannadii jiree
Dembigu boogaha u yeelay
Oo aan cid bixiso lahaynba

Iblays dadka baadiyeeyoo
Waxaa jira beer naxaynoo
Adiga baaba'aaga jecel
Boggiyo laabtaada geli taa

Masiixii badbaadintaadii
U yimid beri hore adduunka
Haddaad maanta beeninayso
Miyaad ka baqayn qiyaamaha
Xaqii aad ka bayrtay awgii
Inay belo kaa horraysaba

Iblays burburiyayba tiisii
Ku caasiyay Boqorkii waynaa
Yaanu adna bohosha naartiyo
Cadaab ba'an kuu horseedin

KAMA BAXO ILAAHAY

Amin A. Ahmed

Naftaydoon baraarugin
Baadinimo daraaddeed
Intay xaqii ka bayrtay
Baaqyadii Iblayskiyo
Beentaba run mooday

Sow belaayadaa idil
Rabbi kamuu badbaadinin
Dabeed biyihii noloshana
Berigaaba lama siin

Kama baxo Ilaahay
Ballamaha uu qaadee
Bogga taa ku haysoo
Noqo adeege loo bogay

Naftaydoo ba' iyo hoog
Intuu baday Iblayskii
Beegsan wayday nuurkii
Dunidaba badbaadshee
Lagu wada baraaray

Sow Boqorkii waynaa
Uma soo birmaninoo
Intuu ka saaray bohoshii
Xaqii uma bidhaaminin

Kama baxo Ilaahay
Ballamaha uu qaadee
Bogga taa ku haysoo
Noqo adeege loo bogay

BAAQUSE WUXUU YAHAY

Amin A. Ahmed

Bulshadaan jeclaayay
Sida il buur dusheedii
Ka soo burqatay oo kale
Ayaan beryahan oo idil
Galladdii badbaadada
Biyahedii aan dhuray
Sibraar kaaga buuxshaa

Baaquse wuxuu yahay
Boogihii lagu dhayay
Birta inaad ka dhawrtood
Dembigana ka bayrtood
Isu dhiibto Boqorkee

Sida webi butaacay
Dhulkii boorku jiifiyo
Beerihii waraabshaan
Barwaaqadii Injiilkiyo
Nimco lagu bogsooday
Adigoo aan baal marin
Ku baraar ku leeyahay

Baaquse wuxuu yahay
Boogihii lagu dhayay
Birta inaad ka dhawrtood
Dembigana ka bayrtood
Isu dhiibto Boqorkee

BAL GUDO WAAJIBKAA KU SAARAN

Amin A. Ahmed

Qaar badan bay weli naftoodii
Badbaadadii loo hibeeyay
Bayaan u arkaynin maantoo
Beentiyo dhalanteed ka raacay

Kolkii xaqa loogu baaqee
Qorniinka in la baro la doonaba
Markaaba intay ka boodaan
Colaad ba'an kuula yimaaddaan

Adigu ha baqan falkoodde
Inaad baahiso Injiilkuu
Boqorku kaa dhawrayaayee
Bal gudo waajibkaa ku saaran

Qaar buu beri hore Iblaysku
Boggiyo maankaba u degay
Oo aan weli dhibtii uu baday
Iyo booghuba damqaynin

Adiga oo u beer naxaaya
U birmo kolka aad tiraahdo
Nacayb buuxa kuula yimaaddoo
Waxaa jira belaayo doon ah

Adigu haka baqan falkoodee
Inaad baahiso Injiilkuu
Boqorku kaa dhawrayaayee
Bal gudo waajibkaa ku saaran

II BOGSIIYAY LAABTABA

Amin A. Ahmed

Gu'yaal badan Iblayskaan
Dartii u baadiyoobay
Beentuu igu dhuraayiyo
Halistuu i soo baday
Adaa iga badbaadshoo
Iga samata bixiyaye

Boqorkow waxaad tahay
Rabbigii boogta ii dhayay
Qalbigii bukoodiyo
Ii bogsiiyay laabtaba

Anigoon is bixin karin
Iblays boqonta iga xiray
Runtaan baal maraayiyo
Xaqii adaa i barayoo

Ii bidhaanshay dulucdiyo

Nuxurkii badbaadada

Boqorkow waxaad tahay

Rabbigii boogta ii dhayay

Qalbigii bukoodiyo

Ii bogsiiyay laabtaba

BAH WEYNTA WALAALAHAA

Abwaan A. K. Q. Dictionary

Bahweyntaa walaalahaa

Ka aqan cadawgii jiree

Kitaabka balaadhanee

Baybalkiyo aayaduhu

Badhtanka kaga qoran yihiin

Ayey barashiyo aqoon

Bartay joogaan dhigtaan

Bar baartaa walaalahaa

Bilaash uma daalayaan

Waxa barakiyo wanaag leh

Bulshada ereygaa addeecda

Bushaariyo waxay helaan

Janada Boqorkeenu sheegay

Badbaado haddaynu doono

Beentiyo iska dhaafno cayda

Siduu Boqorkeenu sheegay

Badhaadhe ayaa la siine
Bulshooy ku dadaal wanaaga

BOQOROOW ILAAHAY

Y. B. Xirsi

Barashada Kitaabada
Barakaa ka buuxdee
Taariikhdan bilan daya
Boqorkii Fircoonee
Kibray ee is biday bari
Tobankii balaayood
Lagu wada burburiyee
Beenawday tiisii

Boqoroow Ilaahay
Awooddiis ballaaran
Reer Bani Israa'iil
Badda loogu jeexee
Lagu wada badbaadshoo
Barwaaqada ku gaadheen

Boqoroow Masiixoow
Badbaadaad na siisoo
Barwaaqiyo wanaaggii
Bishaarooyin haynaa

Ciise waa badbaadada
Buktadii dadkeeni
Cuduradu ku baaheen
Isha bilik tidhaahduu

Barakadaa ku siiyoo

Ku baxeen xanuunadi

Wanaaguu na baraybaa

Injiilada ka buuxee

Bulshadeena wada bara

Aan barwaaqo gaadhnee

Baryadoo la badiyiyo

Usoo baxa salaadaha

Boqoroow Masiixoow

Badbaadaad na siisoo

Barwaaqiyo wanaaggii

Bishaarooyin haynaa

WAA BUSHAAREE

Abwaan A. K. Q. Dictionary

Waa bushaaree

bilkhayr wada dhaha

Waan badbaadnee

Boqolaal ruux

Oo aan baran cilmi

Boqorkeena

Badbaadiyayoo

Barwaaqiyo guul

Waan badhaadhnee

Baryadiyo hees


Ugu boga Rabbi

Waa bushaaree
Bilkhayr wada dhaha
Waan badbaadnee
Burjigeenaa
Buurtaa la'egoo
Baqan maynee
Bilaaba digriga

Waa bushaaree
Bilkhayr wada dhaha
Waan badbaadnee
Inaan baranaa
Baybalkiyo eray
Waa bad baadee
Ku baraaruga

Waa bushaaree
Bilkhayr wada dhaha
Waan badbaadnee
Eebbaan baryeynaa
Bahdeena dhammaan
Inuu barakeeyo
Janada wada bido

Waa bushaaree
Bilkhayr wada dhaha
Waan badbaadnee
Aamiinta badiyoo
Bushaarada wacan
Bilkhayr wada dhaha



T



LIIBAANTU TAALLAA

Amin A. Ahmed

Markaan tawbakeenay
Eebbe talada saartay
Sow taajkii noloshiyo
Tanaadnimadii maan hanan

Jidka toosan kii raba
Ha u tago Masiixoo
Tubtiisay nimcada iyo
Liibaantu taallaa


Markaan tiirkii Shaydaan
Ee uu horay u taagay
Ku soo turunturrooday
Ayyu Rabbigu ii turay

Janno kii ku taamayoo
Khayrka tiigsanaayana
Ciise taajir weeyee
Ha ka tuugo imminkaba

TUBTA LAGU HODMEE

Y. B. Xirsi

Tubta raacoo
Taariikhdaa qoran



Tilmaantay waddiyo

Taladeedan yeel

Qoomamkii tagee

Xaqnimada ka tagay

Way taag gabeen

Oon la toosinayn

Tubta lagu hodmee

Lagu taajiraa

Ciisay tagtaa

Kaalay taar u diro

Xertoo taranta oo

Wada taabo galaa

Yaan ku taamaynoo

Waanu tacab gallaa

Guusha loo tartamo

Aynu tiigsanee

Isasoo tuboo


Ciise taar u diroo

Tubta lagu hodmee

Lagu taajiraa

Ciisay tagtaa

Kaalay taar u diro



J

KAN NAFTIISA IGA JECCEL

Amin A. Ahmed

Kan naftiisa iga jecel
Iskutallaabta jeeniga
Aan ku sidan hadiyo jeer
Jaalba iima noqon karo
Waana jihayn Masiixu
Jidka runta ah nagu baray

Jirjirooleyaaliyo
Yaynaan jaahiliin noqon
Cago juglaynta nacabkana
Dhegba jalaq u siinin

Ruuxa iga janjeersada
Ee u jeestay duniyo
Ama ehel la joogaba
Inuu jeelba ii qabin
Iyo jamasho toona
Jawaabteedu waa taa

Jirjirooleyaaliyo
Yaynaan jaahiliin noqn
Cago juglaynta nacabkana
Dhegba jalaq u siinin

HADDAAN JIRRABAADDA GALO

Amin A. Ahmed

Adiga oo jira samada oo
Weliba jooga midigta Aabbaha
Ayaad runtii hadiyo jeerba
Kolba jihadaan maraayo
Jaal iyo wehel iigu tahaye

Haddaan jirrabaadda galo
Cadcad ama lay jarjaro
Marnaba kaama jeedsanaayoo
Jacaylkaagu waygu wayn yahay

Jannada adigoo ku maqan
Ayaad jaar iga fogaynoo
Weliba ii jixinjixaayoo
Jab iyo hoog iga ilaashoo
Ciisow ila jooga baad tahay

Haddii jeer laygu cagajugleeyo
Amaba layga xiro jilbaha
Anigu weligay jidkaagii
Marnaba kama joogsan doono

INUU KULA JIRO MASIIXII

Amin A. Ahmed

Naftaada sidaad u jeceshahay
Waa inaad jaarkana u soortaa

Cadawga kula rabo jabkiyo

Inuu hedda kaa jarana

Waa inaad abidkaaba jamatoo

Hadiyo jeer uba ducaysaa

Haddii kale jidkii Masiixa

Ma tihid marna ruux ku joogee

Jaallow aan kula dardaarmee

U jeedso wanaagga maantaba

Hadduu jeebkaagu maran yahay

Waxaad marin lahayd jidiinka

Adigoon jirribaad u gelin

Waa inaad garataa judhiiba

Inuu kula jiro Masiixii

Goor walba kuu jixinjixaayay

Haddayse jaahilnimo ku qaaddo

Dhan kalaad u janjeersan doontaa

Rumaysadka jeex ha luminee

Si dhab ah abid ugu jidbaysnow

MASIIXAAN U JIDBAYSANAAYOW

Amin A. Ahmed

Anigoo dhalanteed aan jirin

Sidii jooharad u haysto

Iblays jaal run ah u mooday

Xaqii aan u jeedi waayay

Adaa igu soo jiheeyoo

Weliba jago aan mudnayniyo
Janniyo nolol iigu deeqaye

Masiixaan u jidbaysanaayow
Naftaydu u jeellanaydow
Dhabtii jacaylkaagii waynaa
Jeer qurah ma illaawi karayee

Anoo jid qalloocan raacay
Jahannamo u sii arooray
Aadaa jahli iga badbaadshay

Meel walba ila joogehiyyow
Marnaba kaama jeedsan karayee
Illayn qalbigaad dhex jiiftaa
Kuu ooman hadiyo jeerba

Masiixaan u jidbaysanaayow
Naftaydu u jeellanaydow
Dhabtii jacaylkaagii waynaa
Jeer qurah ma illaawi karayee

JANADAYNU TAGAYNAA
Abwaan A. K. Q. Dictionary

Jahanaba ka dheeroow
Jaarka nabada bara oo
Jidka toosan raacoo
Janadaynu tegiye
Ha ka jeedsan weligaa

Jiradiyo bukaan kana
Wuu joojiyaayoo
Ka jaraa ciddii jecel

Jabka iyo dhibaataada
Jirabaayo shaydaan
Kii joojinaayeee
Janadiyo barwaaqada
Ku jiheeya aadmiga
Jaliil Ciise weeyaan

JALIIL BAA NA CAAWIYA
Abwaan A. K. Q. Dictionary

Jawigeena fiicani
Waxa uu la joogaa
Jaliilkeenna weynoo
Meel kastooynu joogniyo
Jiho kastooynu qabanaba
Wuu inala jiraayoo
Wuu inala joogaa
Qofka jaahilkeen baran
Jara een cisaynini
Jaliil kaa wax siiyoo
Kama jaro anfaaciga
Jidhkiisiyo naftiisaa
Darteen loo jar jarayoo
Jaliil baa awood badan
Ku joojiyey dan biyadii



X

EEBOW ADI IGA XIJAAB

Amin A. Ahmed

Inaan Xamar-cadde tagoon
Ka dhiso xarun aad u wayn
Xertuna ku soo wada hirtaan
Ayaan xoogga saarayaayee
Rabbow xikmad iyo isii
Aqoon xeelad sare ku dhisan

Xumaan faleyaal i neceb
Ayaan xero la deg is leeyahay
Eebow adi iga xijaab
Xarkahay ii soohanaayaan

Anigu xaaladdan ku jiro
Adaan abid kugu xamdiyi
Xiskaygaan kuba hayaa
Xusuustiisii igama bi'in
Dhiiggii xinjiraha lahaa
Dembiga iga soo xoreeyay

Xaq diide ayaa i sugayoo
Weliba xarash ii hayee
Eebow xaasidiinta jira
Kay eel xumbo dabayli qaadday

XORSE WAXAA KA DHIGA KARA

Amin A. Ahmed

Xilligayno joogno
Xaajo uguba maaha
Dunidani xumaantaba
Hadday xeer ka dhigatay
Iskana xoortay galladdii
Xaakinkeennii siiyay

Xorse waxaa ka dhigi kara
Kolkay xagga Masiixa
Ku xiraanba laabtoo
Xaqana wada rumeeyaan

Inay dunida xukumaan
Kuwii loo xambaarshay
Qaar baan gudan xilkaasoo
Iyaga oo xaq diid ah
Xasilooni darro iyo
U xagliyay shaqaaqada

Xorse waxaa ka dhigi kara
Kolkay xagga Masiixa
Ku xiraanba laabtoo
Xaqana wada rumeeyaan

XOG SUGAN CIISEBA KA HAYNIN

Amin A. Ahmed

Xilkaa ina saaran maantana
Xishoodiyo cabsi u baahnayn

Waa inaan baaddilkiyo xaqaba
Xadatkooda kala caddaynoo
Aadmiga uga qaadno xuubkee

Illayn weli qaar xaqiiqiyo
Xog sugan Ciiseba ka haynoo
Iblays ka xoroobin baa jira

Mas'uuliyaddaan xambaarnay
Xikmad iyo aqoon ka maarmin
Waa inaynu si xeeladaysan
Dunidaa ka xanniban nimcada
Xarigga uga furi lahaynee

Illayn weli qaar xaqiiqiyo
Xog sugan Ciiseba ka haynoo
Iblays ka xoroobin baa jira

XISHOODKA OGAADA

Abwaan A. K. Q. Dictionary

Xuquuqda wanaagsan raaca
Xantiyo ka fogaada wixii xun
Xertii Sayidkaad tihiine
Xishoodka ogaada huuno

Xifdiga barashada Kitaabka
Xusuus u lahaw qoraalka
Xaq iyo kala garo xumaanta
Xujuu kugu yahay Injiilku

Kaa reeba xumaanta oo dhan


Xilbaa kaa saaran aadmi
Xurmaa la isku leeyahee
Xilbaa kaa saaran diintee
Xaq dhawr ku samee wanaagsan
Xil iyo iska saar masuul
Xishood kuna waa wanaag

ALLOOW XERTA GUUSHA SII
Y. B. Xirsi

Shaydaanku xumuu wadaa
Xabsiga qaar buu ku riday
Xertii kala yaacdayoo
Injiilka inuu xanibo
Ayay xaajadiisu tahay

Xayuunoow Qaadiroow
Xertii kuu qayshatee
Dulmigan xoog naga furfura
Xagaaga Alloow ka keen
Xornimo kaalay noogu deeq

Aabboow xukun iyo awood
Xagaagay wada jiraan
Xumahan kala daadiyoo
Xaqnimo sharaf loo xamdiyo
Alloow xerta guusha sii



Xayuunkaan tuugayoow
Dadkoo ka xorooba cadaw
Masiixa xagiisa yimid
Nimciyo xoor wada dhamaan
Xagaaga ka tuugayaa



D

DADKAA JIREE MAANTA NACAYA

Amin A. Ahmed

Hadday dhegtu iska dalooshoo

Wacdigu uba sii dusaynin

Wanaag kastoo loogu deeqo

Qalbiga uma daadegaayee

Dulucda waxaan uga socdaa

Duulkaa maqlay aawadood

Masiixa in loo daldelay

Haddana duhuriyo habeenba

War u kaalaya diidnay yiri

Waxaanse ugu soo duceeyaa

Dantooda inay gartaanoo

Iblayskan dullaysanaayana

Dabarka u jaraanba maanta

Hadday dawadii bogsiin lahayd

Naftuba doondonanayn

Cudurkii daashaday mar hore

Inuu dilo kama badbaaddee

Waxaan taa uga dan leeyahay

Dadkaa jiree maanta nacaya

Masiixii u daadshay dhiigga

Dhamman inay wada dareemaan

Inuu gallad wayn dul dhigay

Waxaanse ugu soo duceeyaa
Dantooda inay gartaanoo
Iblayskan dullaysanaaya
Dabarka u jaraanba manta

WAXAAN DADKAA KU ORAN LAHAA
Amin A. Ahmed

Waxaa dilaya aadmiga
Oo runtana ka sii duwa
Waa damac adduuniyo
Maalkan dunida yaallee

Risiq daa'inkeen qoray
Oo dammaanadqaad leh
Ayay orod ku doonaan

Miyay haadda duushee
Kaydba aan diyaarsanin
Tusaaleba ka daalacan

Waxaan dadkaa ku oran lahaa
Iblays dulloobay awgii
Dariiqli Masiixiyo
Badbaadada haw diidina

Waxaa ay dabayshiyo
Duufaantu qaaddaa
Kuwa daarta aakhiro
Ka doorbiday adduunyada

Daal aan yarayniyo
Dadaal waxay ku bixiyaan
Duunyo kasbashadeede

Waase duul ogaynba
Inaan deeqda Eebbahay
Awood lagula soo degin

Waxaan dadkaa ku oran lahaa
Iblays dulloobay awgii
Dariiqii Masiixiyo
Badbaadada haw diidina

MARNA YUU KU DUUFSANIN

Amin A. Ahmed

Dunidani kuweedii
Ama duul habawsani
Hadday kulaba doodaan
Dawo ma leh warkoodee
Yaanu diiqo kuba gelin
Waddo baasna kugu duwin

Xaqii kuu dillaaciyo
Ha dayicin badbaadadu
Rabbigu kuugu deeqay

Ciise ruux dafirayoo
U dabrani Iblayskana

Marna yuu ku duufsanin

Ruux daryeelay tiisaa
Tu kalena ku sii dara
Mid dulloobay isaguba
Daa'inkii abuuray
U hoggaansan diiday
Durbaan yaanu kuu tumin

Galladdaad la deristay
Durdurkeeda aan gurin
Dhex dabbaalo weligaa

Ciise ruux dafirayoo
U dabrani Iblayskana
Marna yuu kuu duufsanin

DEELQAAFKII WAAN NACAY

Amin A. Ahmed

Dabkii igu baxaayiyo
Ama daqarradaan qabay
Ciisaa iga daweeeyoo
Durdur ay nimcadu taal
Dhex dabbaalo igu yiri

Anna derejo iyo maal
Damacoodu ima hayo
Waxaa dunida yaalna
Isagayga deeqaba

Anigoo dembiile ah
Kii i doortay shalay baa
I daryeela maantana
Dabcigii xumaa iyo
Deelqaafkii waan nacay

Samo inaan la deris ahay
Kama daahna aadmigu
Doqonkaan ogayn baan
Dawga tusi is leeyahay

GARTA WAA DANTIINNEE

Amin A. Ahmed

Ruux hadduu damiin yahay
Waa lagu dadaalaa
Mase jiro dariiq furan
Doqoni loogu hiilliyo

Dabka aad tiraahdo
Xaggan ugaba soo durug
Ayay diiday kugu oran

Kollay inaan daweeyo
Dawga toosan aan baro
Daruustii Injiilkana
Bal daalaco iraaqdo
Waa midaan ka daalayn

Qaar la duufsadaa jira
Neef dabrani sidiisii
Dullinimo ku nooloo
Laga daynba xero baas

Adigoo u diir naxay
Ka damqaday dhibtooday
Ku dagaalayaanba

Xil baan dusha ku qaaday
Inaan dunida oo dhan
U digaan u taagnahay
Haygu nicina duulyahaw
Garta waa dantiinnee

SAYIDKII I DOORTAY BAAD TAHAY

Amin A. Ahmed

Dunida inta aan ku noolaahay
Rabbow digrigiyo xuskaaga
Marnaba kama daalayoo
Dabiibkii naftaydiyow
Dubaaqaan kugu hayaayee
I daadihi adigu weligaa

Sayidkii i doortay baad tahay
Weliba anigoo dembiile ah
Dartay dhiiggaad u sayrtay
Ayaa daahir igaba dhigayee

Dhabtii duhuriyo habeenba
Waxaan ku ducaysanaayaa
Dharaartaad soo degayso
Oo aad dib u iman adduunka
Inaad anigoo diyaar ah
Samada iila duuli doontee

Sayidkii i doortay baad tahay
Weliba anigoo dembiile ah
Dartay dhiiggaad u sayrtay
Ayaa daahir igaba dhigayee

KU DADAALA WELIGIIN
Amin A. Ahmed

Looma joogo dunidani
Dalxiis iyo damaashaad
Danta guudse waxa tahay
Daa'inkeennii waynaa

Daacad in loo ahaadoo
Dariiqii uu jideeyiyo
Lagu hirto docduu jiro

Ku dadaala weligiin
Degdeg inaad u raacdaan
Kan dhiiggiisii daadshoo
Isu dulleeyay awgiin

Waa daar adduunyadu

Iyo aqal dumaayoo
Dadkiyo uunka kaleba
Cidna aanay dul joogayn

Degelkaa qiyaamaha
Hooy la dego ayaa jira
Dibna looga soo noqn

Ku dadaala weligiin
Degdeg inaad u raacdaan
Kan dhiiggiisii daadshoo
Isu dulleeyay awgiin

DARIIQUNA CIISE WEEYAAN

Amin A. Ahmed

Qof is raacshay dunidani
Dambarkeeda maal yiri
Isaga umbaa ku daaliye
Waanse idiinka digayaa
Dadaw maqal warkaygani

Daw keliya ayaa jira
Xagga Daa'in loo maro
Dariiquna Ciise weeyee
Doondoona imminkaba

Doonistii Ilaahay
Ku dadaala weligiin
Sidaad daarta aakhiro

Naarba ugu dareerin
Dabkana uga badbaaddaan

Daw keliya ayaa jira
Xagga Daa'in loo maro
Dariiquna Ciise weeyee
Doondoona imminkaba

Adduunyadan ah duugga
Kan ay dabartay maantoo
Dubaaqaba ku haynin
In la duubi doonaba
Wax ma dhaamo duunyada

Daw keliya ayaa jira
Xagga Daa'in loo maro
Dariiquna Ciise weeyee
Doondoona imminkaba

Hadday ku deeqi waanadu
Durba waxaan ku oran lahaa
Intuu hammigu kula degin
Damac adduunna kula tegin
Ka soo durug belaayada

Daw keliya ayaa jira
Xagga daa'in loo maro
Dariiquna Ciise weeyee
Doondoona imminkaba

RUUXSE WAXAA DULLAYN KARA

Amin A. Ahmed

Dadkii aan jeclaayow
Boqortooyadaan dumin
Daa'inkeenu leeyahay
Doon-doonisteedii
Horta saara diiradda

Dabeed waa la idiin siin
Kolba wixii idiin daran
Dubaaqaba ku haysaan

Ruuxse waxaa dullayn kara
Kolkuu damaca kiisa ah
Maalka dunida yaallaba
Daba orod yiraahdee

Dawaduse waxay tahay
Ku jirtaa dantiinnuna
Kolkaad daarta aakhiro
U diyaargarawdaan
Hammigana ka durugtaan

Nafta baas la diriroo
Intaad laabta dabartaan
Doorta nolosha weligeed ah

Ruuxse waxaa dullayn kara
Kolkuu damaca kiisa ah

Maalka dunida yaallaba

Daba orod yiraahdee

NUUR BAA KA DAALACAY

Amin A. Ahmed

Nin dartii ayuu shalay

Dembiguba ku yimidday

Waase Daa'in mahaddii

Dabeetana inay timid

Gallad deeqday aadmiga

Masiixii la soo diray

Ayaa caynshay dunidoo

Dusha saartay gefafkii

Dadka looba haystaye

Doc walbana adduunka

Nuur baa ka daalacay

Uunkoo dhami ku diirsaday

Dadkoo wada hallaabay

Wax u diir naxaba jirin

Sida duunyadoo kale

Uu dabraday Iblayskuu

Soo daahiray Masiixuba

Kuwii cudurku daashaday

Dabiib dhab ah u baahnaa

Intuu wada daweeeyay

Weliba nolol u dooray

Doc walbana adduunka

Nuur baa ka daalacay

Uunkoo dhami ku diirsaday

DOCDUU MASIIXU KAA JIRO

Amin A. Ahmed

Dadka waxaa u liita

Doqon aan ku soconayn

Dariiqii xaqa ahaa

Daa'in raaca nagu yiri

Diracuse ma mooga

Inay tahay dantiisu

Inuu daarta aakhiro

Sahay u sii diyaarsado

Waa iga dardaarane

Qof walbow u soo durug

Docduu Masiixu kaa jiro

Waxaa maanta ugu daran

Damiin kibirku qaadee

La dagaala ruuxii

Khayr la doon yiraahdaba

Midse kaa ka duwanoo

Ku dadaala baa jira

Inuu dayacin galladdaa
Loogu deeqay aadmigu

Waa iga dardaarane
Qof walbow u soo durug
Docduu Masiixu kaa jiro

UGU DUCEEYA IYAGUNA

Amin A. Ahmed

Qaar la duufsanaayoo
Laga duway xaqii baan
Intaa daba ordaayoo
Sharta uga dig leeyahay

Culimo daallimiin ah
Shaydaan diiddan samahaa
Uga daaban hoostoo
Dariiqaba ka weecshee

Kuwiinnan la doortow
Nimcadaad la deristeen
Bal inay dareemaan
Ugu duceeya iyaguna

Kuwo dunida raacoo
Dafiray Masiixaan
Duhuriyo habeenba
Hanuunkaba la doonaa

Kolkaan dood la yeesho
Daruus wacan aan siiyana
Dabaday waxaa lumin
Duul kalee habaar qaba

Kuwiinnan la doortow
Nimcadaad la deristeen
Bal inay dareemaan
Ugu duceeya iyaguna

DOONDOONA WELIGIIN

Amin A. Ahmed

Inaad Daa'in raacdood
Ku xirnaato dunidana
Waa labo is diidaya
Sida dab iyo biyahay
Isu daran yihiinee

Waayo mid baad la deristaa
Una jeclaan si daacad ah
Midna waad ka durugtaa
Quursataa dabeetana

Waxse iga dardaraan ah
Dadyahaw dhammaantiin
Doondoona weligiin
Boqortooyadaan dumin

Hadduu Masiix ku doortay
Wuxuu kaaga sii digay
Haddii aanad daynayn
Kama duwanid caasiga
Diiday inuu rumaystee

Waayoo inaad dembawdo
Haddana daahir noqoto
Labaan laysku darin weeyee
Dubaaqaaga geli taas

Runtaan ka qaaday daaha
Dulucdeeda dhuuxoo
Nafta oo la dayrshay
Badbaadadu ku darartaa

XAQANA DIIDAAYA YEELKII
Amin A. Ahmed

Kan doonaaya inuu badbaado
Ka baxo dulliguu ku jiro
Haddaanu raacin dariiqii Ciise
Dooddiyo hadalkiisu waa been

Haddii aanu digniinta qaadan
Injiilkana daruus ka baranayn
Xaqana diidaaya yeelkii

Kan jecel dembigiyo xumaanta
Inuu daahir kaba ahaado

Hadduuba dafiraayo Ciise
Runtaba weli muu dareemin

Haddii aanu iftiinkii daalacay
Docdiisa u soo hayaamayn
Xaqana diidaaya yeelkii

AMAR LAY FARAY DARTII BAA

Amin A. Ahmed

Anigu dadku waxay yiraahdaan
Dan iyo xaajo kama gelaayee
Iyagaan u diirnaxaayoo
Rabaa inaan wada daryeeloon
Ku soo hago dariiqa toosan

Illayn waajib lay dulsaariyo
Amar lay faray dartii baa
Mar walba igu dirqin xaggoodee

Duulkaa i colaadsha oo dhan
Nacaybkoodu ima damqaayoo
Xaqay diidmada ka keeneen
Ayaan ugu jiraa dadaal dheer
Inaan daaha ugaba qaadee

Illayn waajib lay dulsaariyo
Amar lay faray dartii baa
Mar walba igu dirqin xaggoodee

HADDAANSE LOO NOQON DIYAAR

Amin A. Ahmed

Rabbigu wuxuu doonayaa
Dunida in loo dhaqaaqoo
Injiilkay weli dareemin
Inta daaha looga qaado
Dariiqaa cad loo tilmaamo

Siday dulli uga baxdooy
Dembiga uga tawbadkeento

Haddaanse loo noqon diyaar
La fulin wixii laysu diray
Halkaa dayac inuu ka jiro
Daliisheedu way caddahay

Rabbigu wuxuu diidayaa
Dadkuba inuu wada lumoo
Naaraan weligeed damayn
Dabeed ku halaagsamaan
Cadaab daran kuna mutaan

Sidii loo daryeeli lahaa
In loo damqaday rabtaa

Haddaanse loo noqon diyaar
La fulin wixii laysu diray
Halkaa dayac inuu ka jiro
Daliisheedu way caddahay

WELIGAA I DAADIHI

Amin A. Ahmed

Aadmiga daraaddii
Haddii aanad u soo degin
U daadininba dhiiggii
Dibba uma heshiiyeen
Ilaah iyo dadkiisii
Kala duruksanaan jiray

Ma dulloobo ruuxaad
Ciisow nolol la doontee
Dubaaqaygii adigaa
Ku daabacay qorniinkee
Weligaa i daadihi

Dadka oo la duufsaday
Galay dabintii shaydaan
Si uu dembiga uga dhaqo
Daryeel wacan u fidiyo
Kii u soo degdegayoo
U soo daahiraa tahay

Ruux kastoo ducaysani
Dariiqaga kama lumo
Ilayskaa aan damin baan
Anna daba socdaayee
Weligaa i daadihi

KALA DOORO LABADAAS

Amin A. Ahmed

Dunidaad ku nooshahay

Labo doonyo baa jira

Mid uu Ciise daadihin

Rumaystahu dusheedii

Farxad kula dekeeyoo

Aan degaynin weligeed

Midna way dalooshaa

Meel daran ku quustaa

Duul Iblayska raaca

Ogow lagu dagaayoo

Dabin loogu dhigayaa

Adaa garan dantaadee

Kala dooro labadaas

Inta aanay doqonnimo

Dabbaalnimadu kula tegin

Labo dariiq ayaa jira

Mid cadaabta daraniyo

Shartaba kaaga digayoo

Degel lagu negaadiyo

Kuu diyaarshay nolol uu

Rabbigu kuugu deeqaye

Midna naar ku dubaniyo

Jahannamo docdeedu

Adigoon dareemayn

Kugu sii duwaayoo
Iblays kaaga dhigi deris

Adaa garan dantaadee
Kala dooro labadaas
Inta aanay doqonnimo
Dabbaalnimadu kula tegin

OGOW DAMACEEDA WAALANI
Amin A. Ahmed

Haddii naftu waxay dalbayso
Ku qanci durbaba tiraahdo
Ogow damaceeda waalani
Wuxuu diiradda u saaraa
Wuxuu Rabbi kaaga digayoo
Dembiyo xumo kuu horseedee

Haddaad dabar adag ku xiran
Oo aad la dagaali waydo
Meel daran inay kugu hagayso
Miyuu kaa saran yahay daah

Haddaad nafta doonisteedii
Dubaaqaba uga riyaaqdo
Waxay doorataba u yeesho
Ogow inay dulligii baasiyo
Mar kale dabinnadii Iblayska
Dib uun kugu sii hoggaamin

Haddaad dabar adag ku xiran
Oo aad la dagaali waydo
Meel daran inay kugu hagayso
Miyuu kaa saran yahay daah

DUNTUNA IIGU KAA XIRNAATO
Amin A. Ahmed

Kolkii uu i dagay Iblaysku
Anigoon duunyada wax dhaamin
Rabbow adaa ii damqadayoo
Durbaba iga soo kaxeeyay
Dabkiyo naartaan ku taagnaa

Inaan ku daba rucleeyo
Duntuna iigu kaa xirnaato
Weliba dabarjaro xumaantii
Ayaan nafta kula dagaalaa

Rabbow anigoo dembiile ah
Dacarta muutsanaaya baad
Hanuun ila doontayood
Malabkaan iska diidi jiray
Dabeed igu tiri ka dhereg

Inaan daacad kuu ahaadoo
Dariiqaga toosan raaco
Marnaba kuma doorsanaayo
Inaan dullinimo ku laabto

RUMAYSTA EREYGA FIICAN

Abwaan A. K. Q. Dictionary

Ruuxii damiirloow

Inaguu daraadeen

Duurka uu u galayoo

Dakhtariyo dhibaatiyo

Duruuf adag u marayuu

Dartood inay rumaystaan

Dariiq dheer u soo maray

DIGRIGA RABIGAAN

Abwaan A. K. Q. Dictionary

Anoo daal go'ay

Dariiqa heloo

Digriga Eebbaan

Ku daal baxayoo

Anoo dayacnaa

Rabbiga doortoo

Dawgiyi sharcigaan

Diyaar u aho

Daliilkiyo wacdigaan

U daalanahoo

Diyaar uma ahi

Duufsiiga Shaydaan

Dadkoo hurda baan

Dartii u kacoo

Dambiguu maydhaan

Dartii u baryoo

Damiir kayгаа
Aniga i diroo
Dadaal dheer baan
Dawгаа u marooo
Madaalo intaan
Dunida joogeee
Daqiiqad qudha
Madayn karayoo
Dayrkii janadaan
Dushiisa arkeee
Diyaar garoowaan
Dadyahow leeyahay

DARIQAA MASIIX

Y. B. Xirsi

Dad la doortayoo
Dambi iyo xumaan
Laga daahirshoo
Dariiqii xaqnimo
Lagu soo duwaa
Dib uma laabmayaan

Dab haddaad shiddiyo
Daldalaad la xidho
Nama didin kartee
Dariiqaa Masiix
Waan dikriyaynaa

Dil nalloo xidhiyo
Duudsi iyo xumaan
Nama dabar jartee
Dariiqaa Masiix
Waan dikriiyaynaa

Midkii duudsi wada
Doonistii Iblays
U dabbaal dagoow
Nama dabar jartide
Dariiqaa Masiix
Waan dikriiyaynaa

Xaqa lama dadoo
Lama duwi karee
Duhur iyo habeen
Dariiqaa Masiix
Waan dikriiyaynaa

Dadkeenoo dhammaan
Dawo iyo Injiil
Degdeg u heloo
Kama daalaynee
Dariiqaa Masiix
Waan dikriiyaynaa

DAA'IMOW ILAAH

Y. B. Xirsi

Daa imoow Ilaahow
Dadkaagii la duubyoo
Dulmi iyo xumaan iyo

May galin dunuube

Waa adi daraadaa

Adigaa na doortoo

Dambigayga maydhoo

Noo diray Injiilkee

Mucjisooyin dooriyo

Degdeg Ruuxa noo sii

Deeloow Masiixoow

Noo soo deg maantoo

Dadkaagii la dhibi jiray

Kaalay daad gureeyoo

Nolol daa'imaadkii

Degdeg kaalay noo gee

Dadkeenoo badbaadoo

Dikrigiyo ammaantii

U dareera Ciisaan

Wadnahaygu doonoo

Farxad ugu ducaystaa

Dambi waa halaagoo

Dabka badaha yaaliyo


Daakhil buu ku gayn daran

Ciisay dawadu tahay

Aad dadkiisa noqotide

Degdeg kaalay noo raac

Cirkoo noo darooriyo



Barakooyin daahira
Dawo caafimad buu
Rabbi noogu deeqoo
Waan dabbaal dagaynaa

Dadkoo noo badbaadoo
Dikrigiyo ammaantii
Udareeray Ciisaa
Wadnahaygu doonoo
Farxad ugu ducaystaa



R

ILLAYN WAA RAFIIQ LA HUBO

Amin A. Ahmed

Ogow qof rafaad ku jiray
Runtii nasashaba an helin
Hadduu erayada Rabbiga
Rumeeyoo uu wada aqbalo

Rarkaba isagaa ka dejin
Rayn rayn iyo farxad go'aynba
Durbaba ku rusheeya goortaa

Illayn waa rafiiq la hubo
Iyo roone dadkiisa jeceloo
Aanay raxmaddiisu gurin

Ogow ruux baadiyoobay
Weligii raad been ah iyo
Dhalanteed run moodi jiray
Hadduu dhab u raaco Ciise

Hubaal rajo buu ku noolaan
Rasmi ah oo lagu hungoobayn
Qiyaamana raaxo joogta ah

Illayn waa rafiiq la hubo
Iyo roone dadkiisa jeceloo
Aanay raxmaddiisu gurin

RAYN-RAYN BAAN KU NOOLAAN

Amin A. Ahmed

Ruuxaa i hagayoo

Runta igu dhaqaayoo

Iga reebay xumihii

Raxmaanow Allahayow

Gargaarahan i raacaya

Adigaa rafiiq wayn

Rasmi ahooy igaba tegin

Ii roon igaga dhigay

Raxmaddaadii awgeed

Adaa rarankii naartana

Rabbow iga xoreeyay

Farxadaan rogmanin iyo

Rayn-rayn baan ku noolaan

Rug kastoo aan joogana

Runtii adiga weeyaan

Midka guusha ila rabo

Aabbow Raxiimow

Inaan gelin rafaad baad

Risaq igaga yeeshay

Cutubyada rasaysan

Ee ku raran qorniinnada

Raxmaddaadii awgeed

Adaa rarankii naartana

Rabbow iga xoreeyay
Farxadaa rogmanin iyo
Rayn-rayn baan ku noolaan

RABBIGU WAA AAMINEE GARO

Amin A. Ahmed

Haddaad tahay ruux u ooman
Raynrayn inaad abid ku joogto
Masiixa inta aad rumayso
Nolol ka rajee xaggiisoo
Adoon ka habsaamin soo raac

Rabbigu waa aaminee garo
Raxmadi laga helo agtiisee
Haddaad maantase ka roorto
Rafaad daran filo qiyaamaha

Haddaad dembigana rarkiisii
Cid kaa ridda aad u baahnayd
Runtii madiga Eebbe mooyee
Rafiiq kaloo taa awood u leh
Ifkaba ha ka raadsan weligaa

Rabbigu waa aaminee garo
Raxmadi laga helo agtiisee
Haddaad maantase ka roorto
Rafaad daran filo qiyaamaha

RAJADU WAY DHAWDAHAYEE

Amin A. Ahmed

Raaxada adduunyada

Waxaa idiinka roonba

Raasamaalka aakhiro

Inaad raadsataanoo

Ruclo orod ku doontaan

Rumaysadkiinnu yuu burin

Hayska ridina buur dheer

Rajadu way dhawdahayee

Is rogrogiddu waa halis

Riddo bay horseeddaa

Rugtaad maanta joogtaan

Raxmadda Eebbe taallana

Si fudud hawga roorina

Waxa ruuxda quudiya

Waa Rabbi erayadiisee

Waxa kalee la ruugase

Nafta ifka ku raagayn

Iyo jirkay u roon yihiin

Qofka taas rumaystana

Wuxuu rafiiq ka yeeshaa

Qorniinkiyo runtuu helay

Is rogrogiddu waa halis

Riddo bay horseeddaa

Rugtaad maanta joogtaan
Raxmadda Eebbe taallana
Si fudud hawga roorina

ADIGAA JACAYL RUN AH

Amin A. Ahmed

Rabbiyow raxmaanow
Annagoo rafaadnay
Rug cidlo ah Iblaysku
Intuu nagu raseeyay
Ha raacina Masiixaba
Nooga ridayay laabta

Raxmaddaadii awgeed
Adigaa jacayl run ah
Roonow nagu badbaadshoo
Rarkii naga dul qaaday

Annaga oo rafiiq iyo
Iblays rixin u moodnoo
Ruux ahaanna dhimannay
Rajo beel ku nooloo
Iftiinkana ka roornoo
Dhalanteed rumaynay

Raxmaddaadii awgeed
Adigaa jacayl run ah
Roonow nagu badbaadshoo
Rarkii naga dul qaaday

RUUXDAYDII DHIMATAAD

Amin A. Ahmed

Cishadaan ku raaceen
Si dhaba kuu rumaystay
Ruuxdaydii dhimataad
Runtii siisay nolol iyo
Rajaan lagu hungoobayn

Xaqii goortaan ruugaan
Noqday ruux badbaadaye
Rabbow adaa leh mahaddaa

Dembi igu rarnaa abid
Markii layga wada rogay
Rafaadkiyo dhibtaan qabay
Kolkaa baan ka raystoo
Raxmadi aan dareemaye

Xaqii goortaan ruugaan
Noqday ruux badbaadaye
Rabbow adaa leh mahaddaa



S

WAA SIRE IBLAYSKUYE

Amin A. Ahmed

Soonkiyo haddaanad
Joogtayn salaaddaba
Suuradaha qorniinkana
Subax iyo habeenba
Sadar sadar u raacayn

Waa sire Iblayskuye
Sida hilib cidlada yaal
Yuu u solan naftee garo

Silaciyo dhibaataada
Haddaad Sayidka awgii
Ku samraynin weligaa
Saatirkii ku uumay
Talo saaran waydo

Intuu siriq Iblaysku
Sahal kuugu dhiga buu
Sabsabtaa naftee garo

KU SII SUGA MADIGII EEBBE

Amin A. Ahmed

Hadduu nin xilkii la saaray
Sidii laga rabay u gudanayn
Sinnaba looguma dulqaatoo
Iskaba socaa lagu yiraahdaa

Yaynaan innaguna sigsaagin
Ka saaqidin hawsha noo taal

Haddaba saba kastoo aan joogno
Innagoo qalbiyada sifaynay
Weliba daahirnimo ku sugan
Ku sii sugno madigii Eebbe

Kollay ninkii seexda weligii
Sacii dibi buu dhalaaye
Haddaba Sayidkii na doortay
U soo wada jeedno awgii

Illayn saacadduu imaan lahaa
ayaa lagu sii siqaayaa

Haddaba saba kastoo aan joogno
Innagoo qalbiyada sifaynay
Weliba daahirnimo ku sugan
Ku sii sugno madigii Eebbe

SIDEE LOO FIDIN INJIILKA
Amin A. Ahmed

Sayidkii ina wada xoreeyay
Darteen silaciyo dhib maray
Haddaba surinkuu na tusay
Oo aan cagta saarnay shalay
Haddaynu saluugno maanta

Sow iimaan ka baxba maaha

Haddaan loo kicin samaha
Naftana samir aan la barin
Sidee loo fidin Injiilkoo
Loo gudan hawsha ina sugayso

Suubane Rabbigii ahaaba
Isagoon dembi lagu sifayn
Dusheennii eedihii surnaa
Inaga saamaxay dhammaan
Haddaan sahashanno warkiisi
Miyaan saafi noqon karaynaa

Haddaan loo kicin samaha
Naftana samir aan la barin
Sidee loo fidin Injiilkoo
Loo gudan hawsha ina sugayso

SAYIDKEENA FIICAN
Abwaan A. K. Q. Dictionary

Samir iyo dulqaad baa
Laga dhigtaa sad kaagee
Si kastooy ahaataba
Sadrigiina geliyoo
Sayidkeena fiican
Soomaalaay addeeca

Saboolkiyo qof baahani

Isagay baryaanoo

Sulufkiyo abaartana

Isagaa ka saaree

Sayidkeena fiican

Soomaalaay addeeca

Subaxdiyo habeenkii

Markuu waagu soo baxo

Sanku neefle idilkii

Sayidkaa wax siiyee

Sayidkeena fiican

Soomaalaay adeeca

SAACADDUU YIMAAD

Y. B. Xirsi

Sayidoow Masiix

Saacad aan filayn

Inuu soo daguu

Eraygii sugée

Soo wada baxoo

Farxaddiisa suga

Saacadduu yimaad

Dadkoo laba safiyo

Xukunbuu sidaa

Kuwii saahidee

Daraaddii u silcay

Saamigii Janadaa


Yaa loo sidaa

Sayidow Masiix
Rabbigaan sugnoow
Saaka soo dagoo
Naxariis na sii

Haddaan silicna oo
Suryo adag gallaba
Si kastaba adaa
Noo saacidoo
Nimcadaadan sugan
Rabbi kaa sugnaa

Salaad joogta iyo
Baryo soon la galo
Soo jeed habeen
Sokeeyiyo xigtooy
Wada sarakacoo
Rabbi sacab u fidi

Jawaab taad sugtaa
Aqbal weeye saxan
Oon saluug lahayn
Bulshooy soo baxoo
Nuur siraadan iyo
Cadceed soo baxduu
Sayidkeenu yahay



Haddaan silicna oo
Suryo adag gallabaa
Si kastaba adaa
Noo saacidoo
Nimcadaadan sugan
Rabi kaa sugnaa



SH

DHIIGGAAGII II SHUBAY

Amin A. Ahmed

Anoo raacay Shaydaan
Injiilkaba sharaystay
Adigaa i shaafiyay
Dhiiggaagii ii shubay
Shuruud li'i badbaadada
Shalay iigu deeqayee

Shukri iyo adaa mudan
Sharaf iyo amaanee
U shiraacday khayrkee
Iga dhawr shiddiyo belo

Shuxshuxdii Iblayskiyo
Anoo sheeko been ah
U sharraxa naftaydoo
Xaqaba shiili waayay
Aadaa shakigii aan qabay
Iga qaaday shuushkee

Shukri iyo adaa mudan
Sharaf iyo amaanee
U shiraacday khayrkee
Iga dhawr shiddiyo belo



DH

HADDAANAD U DHALAN MAR KALE

Amin A. Ahmed

Boqortooyada dhammaystiran
Haddaanad u dhalan mar kale
Dhaayaha inaad saari doonin
Dhuglaawow haatan sii garo

Waayo waxaa dhaxal u helay
Dhammaan inta Ciise raacdee
Dhib yari biyo lagu maqurshay
Weliba iyagoo dhex taagan
Ruuxuna dhaqay qalbiyadoodii

Haddaadse isu dhiibto Ciise
Dembi dhaaf shuruud lahayniyo
Nolol noloshani wax dheer baad
Ka heli doontaa dhankiisee
Si dhab ah u rumayso maantaba

Badbaadshe dhaliil lahaynoo
Aawadaa intuu dhimasho doortay
La dheelmaday gefkaagiyoo idil
Dhaqsaba haddii aanad aqbalin

Dhoohanow waxaad sii ogaataa
Iblayskan kula dhaqaaqee
Dhabarka kaaga rarar xumaha
Maalinta uu dhaco qiyaamuhu
Inaad dhibta la qaybsan doonto

Haddaadse isu dhiibto Ciise
Dembi dhaaf shuruud lahayniyo
Nolol noloshani wax dheer baad
Ka heli doontaa dhankiisee
Si dhab ah u rumayso maantaba

DHIGASHADA KITAABKIYO

Abwaan A. K. Q. Dictionary

Dhulku wuu balaadhanyoo
Dhayal laguma koobee
Markii uu dhaqaaquu
Fariintii u dhiiboo
May dhayalsan Eraygee
Dhakhso waxay u qaadeen
Dhidid badani uga baxay
Sidii ay dharaar qudha
U dhagaysan laayeen
Dhigashada Kitaabkiyo
Ku dhawaaqistiisoo
Dhallaankiyo haweenkana
Loogu dhigayo guryahoo
Dhirta iyo buuraha sare
Dhawaaqii ka yeedhaa
Dhiiri galisay ummaddoo
Dhankastoo la eegaba
Dhinacyada adduunyada
Dadku way u dhololaan
Isu dhiibayaanoo
Dhaguhuna jeclaystaan

DAMBIGI WUU NAGA DHAQOO

Y. B. Xirsi

Masiixbaa noo dhintoo

Intuu dhiiggii qubay

Ayay qabrigii dhigeen

Dambigi wuu naga dhaqoo

Dhamaan cuduradii jiriyo

Dhamee xumihii ka qaad

Dhawaan inuu soo dagaan

Farxadda wada dhawraynaa

Xaggiisa wada dheehanaa

Dambiga waa loo dhintaa

Xumaha lagu dhawacmaa

Wanaag baa guusha dhaliin

Dhabbaha toosan ee la maro

Injiilkaa lagu dhigee

Masiix dhiniciisa imow

Dhawaan inuu soo dagaan

Farxadda wada dhawraynaa

Xaggiisa wada dheehanaa



C

RUUXDUBA CABID KUMA KORAYSO

Amin A. Ahmed

Calool loo hawl galiyo
Inaan dadku cunto u noolayn
Dhabtii Ciisaa ka sii digay

Waxaase caddaan ah maanta
Cilmiga eraygiisa mooyee
Cad hiliba oo la quuto
Amaba caanaha la dhamo
Inaanay qofka caawin karin

Illayn wax calaalintiyo
Ruuxduba cabid kuma korayso
Haddaan cutubyadii la qoray
Cawiyo maalin lagu dul furin

Kolkay xurguf baasi curato
Inaan laysu sii caroon buu
Si cad Rabbi noogu sheegay

Cudurse wuxuu soo hoydaa
Runtii cuqdad laysu qabay
Cadaawadda beeri jiray
Haddaan laga jarin cindiga
Calooshuna saafi noqon

Illayn kolka lays cafiyo
Ayuu caafimaad dhashaa
Dabeed nabad lagu caweeyiyo
Ciribsami lagu negaadaa

WAASE XAAJO CULUS

Amin A. Ahmed

Rabbi Ciise wuxuu yiri

Haddii laydin caayo

Idinkoon caraysnayn

Cod qabow leh weligiin

Waa in cadaawahoo idil

Caaddil haydin barakeeyo

Cuqdad li'i tiraahdaan

Waase xaajo culusoo

Cid Masiix aqbalin weli

U cuntami karaynine

Cilmigaynu baranee

Nafta lagu carbiyay baa

Oggolayn cadgoosigoo

Camalsami na farayee

Taa waxaa caddayn u ah

Kuwa idiin ciqaabuu

Iska cafiya leeyahay

Waase xaajo culusoo

Cid Masiix aqbalin weli

U cuntami karaynine

CULIMO BAAS OO XAQDIID AH

Amin A. Ahmed

Hadduu jaahil caawa garan lahaa
Ciisihii Naasareet kan uu yahay
Marnaba kumuu caasiyeenoo
Cisiyo sharaf buu u hayn lahaa

Waxaase ka cayrin maanta
Iblayska caraysanee raba
Inuu kula go'o ciqaabtoo
Kulana jiro cadaabta weligeed

Warhoy caamaday i maqal
Haddaanad caqliga adeegsan
Hufnaan cilmigana u baran
Rabbiga xaqna aanad ku caabudin
Ciribsami marna ha naawilin

Kan Injiilka u quray caydana
Hadduu cashar qurah ka baran lahaa
Culays wayn baa ka degi lahaa
Masiixuu u soo carari lahaa

Waxaase cindigaba ka xaday
Cilladna kaga sheegay been ah
Culimo baas oo xaqdiid ah
Weliba dadka wada caburiyay

Warhoy caamaday i maqal
Haddaanad caqliga adeegsan
Hufnaan cilmigana u baran
Rabbiga xaqna aanad ku caabudin
Ciribsami marna ha naawilin

IFTIIN KU CASUUMI DOONNAA
Amin A. Ahmed

Haddaan caaddilkeenna wayni
Runtiyo ruux ku caabudaynoo
Astaamihii Ciise leennahay
Hubaal dadku camalladeennuu
Caynkaan nahay ka dheehan doonaa

Kolkaa baan sida cadceedda
Cirrooliyo carruurta soo kori
Iftiin ku casuumi doonaa
Laabtooduna cugi karaynaa

Haddaba cawo iyo dharaarba
Innagoo cillad li'i ku joogno
Waa inaan cutubyada qorniinka
Dunida cashar-cashar u siinnaa

Haddaan khamri caynba cayn ah
intaan cabno oon sakhraanno
Qaadkuna canka nooga buuxo
Siniyo ceebtana ku faanno
Iblays caadadiisii raacno

Sidee baan kuwaa cawaanta ah
Amaba caamadaan dhex joognee
Caqliga looga xaday mar hore
Culimo ugu noqon karaynaa

Haddaba cawo iyo dharaarba
Innagoo cillad li'i ku joogno
Waa inaan cutubyada qorniinka
Dunida cashar-cashar u siinnaa

CAQLI LAAWAHAAN GARAN

Amin A. Ahmed

Iskutallaabta Ciisihii
Lagu qodbay dharaar cadi
Casar gaabadkiina
Xabaal loola cararee
Saddex cishana dabadood
Si caadi ah u soo kacay

Caqli laawahaan garan
Ha ogaado caawaba
Cafis siduu u heli lahaa
Darteed inuu ciqaabtiyo
Calool xumo u soo maray

Curadkii Ilaahay
Oo aan ceeb lahayn bay
Cay iyo u quureen

Iyo cillado aan jirin
Isna umuu caroonin
Caasiyiintii dhibi jiray

Camalsamida awgeed
Waa wuxuu cadaabtaba
Kaga caynshay dunidii
Gefkeedii cusleeyoo
Caawimaad u baahnayd

WUXUU CIISE NOOGA SII DIGAY

Amin A. Ahmed

Wuxuu Ciise nooga sii digay
Inaan culimadii xumaatay
La raacin camalladoodoo
Haddana aan caado laga dhigan
Colaadiyo nac looba qaado
Cadaawahu nooc kastuu yahay

Haddaan kuwaa caasiyoobay
Inaan soo celinno ay tahay
Waa inaan cilmigiyo Injiilka
Casharro ka barnaa iyagu

Waxaa la inoo carbiyay
Amar culus laynagu siiyay
Inaan caawinno dadkaa lumay
Nimcada kaba caagganoo

Ishii ay ka cabbi lahaayeen
Iyo weli ceelkii garanayn

Haddaan kuwaa caasiyoobay
Inaan soo celino ay tahay
Waa inaan cilmigiyo Injiilka
Casharro ka barnaa iyagu

DAFIRAADDA CIISAA
Amin A. Ahmed

Ifka inaad dhex carartoo
Wax cuntoo aad dheregto
Cillad laguma sheegine

Cirib xumise waxay tahay
Kolkaad caasiyawdeed
Caaddilkii ku uumay
Xaqa aanad ku caabudin

Caqli kii lahaw garo
Dafiraadda Ciisaa
Cadaab lagu mutaystaa

Adoo caafimaad qaba
Ciriiriyo dhib aan arag
Cisiyo sharaf ku noolaa

Cuqubo waxay timaaddaa
Caqiidadii runta ahayd

Kolkaad ceeb la doontoo

Diido cindiga kaaga ah

Caqli kii lahaw garo

Dafiraadda Ciisaa

Cadaab lagu mutaystaa

INAAN CIIDO HAATAN WAA DAW

Amin A. Ahmed

Waxaan ka go'ayn calooshoo

Cindiga mar kastaba ku wayn

Rabbow cishadaad naftaydii

Cadaabtii ka badbaadisoo

Calafkayguna samaaday

Inaan ciido maanta waa daw

Anigu farxad kuba caweeyoo

Mahadna adi kaaga celiyo

Ciisow nimcadaad i siisay

Anoo qaba murugo iyo ciil

Curyaan iga dhigay Iblaysku

Adaa cagahaygii furayoo

Caaniyo nabad iigu deeqay

Iyo ciribsamida maantee

Inaan ciido haatan waa daw

Anigu farxad kuba caweeyoo

Mahadna adi kaaga celiyo

Ciisow nimcadaad i siisay

CIISAA BOGSIYEY

Abwaan A. K. Q. Dictionary

Ciisaa bogsiyey

Curyaankii saaraa

Cariishka dushiisa

Ciisaa bogsiyey

Ninkuu cudur fuulay

Iyo kii cadhoobay

Ciisaa bogsiyey

Xertii cabanaysay

Iyo ciddii indho beeshay

Casiis siiyay mucjiso

Uu ku caawiyo aadmi

Cid kastoo cabanaysa

Ciddii jecel Ciise

Casuumad layaable

Ciqaabi ka dheertay

Carfiga udugiisa

Cirkaa laga sheegay

HADAL CIISE YIRI

Y. B. Xirsi

Cirkoo soo da'iyo

Cosob iyo ugbaad

Caleentii gu' yaal

Cuudkii wada dhalay

Casarkii candhadaa

Caanuhu da'aan

Cayn kastaba nimcada

Rabbigeen camiray

Nafka caaganoo

Jacayl Ciise galay

Ooy ciilayaan

Caawintaada sii

Da' yartoo ciyaar

Caways fiidka tuman

Loo camiraybaan

Kali coogayaa

Hadal Ciise yiri

Kama cabsanee

Waan cadaynaynaa

Caynkastaba nimcadaa

Rabigeen camiray

Naf ka caaganoo

Jacayl Ciise galay

Caawintaada sii

CODSI BAAN SIDAA


Y. B. Xirsi

Ciisoow Masiix
Codsii baan sidaa
Xer la ciilayoo
La cadaadiyoo
La ciqaabay baan
Ciidan soo furfura
Caawa kaa dalbaday

Way caayayaan
Ooy cirdaynayaan
Siday cadaw yihiin
Cambaaraynayaan
Dhirbaaxooyin culus
Ku cagaynayaan

Ciisoow Masiix
Caynkastaba awood
Kuu camirantee
Cirka noo furoo
Malagyada camiran
Caawa noogu deeq

Hooyo canug siddiyo
Cadradaheeni kale
Caalimkii Maxamed
Xer cadaysatoo



Ciise raacday bay

Wada ciilayaan

Waa caruur Ilaah

Cidna maanay xadiin

May cunin xaaraan

Caashaqii Masiix

Cindigooda galay

Loo ciqaabayaa

Ciisoow Masiix

Cayn kastaba awood

Kuu camiirantee

Cirka noo furoo

Malagyada camiran

Caawa noogu deeq



G

ANIGU KAMA GAABIN DOONO

Amin A. Ahmed

Rabbow adaa ii gargaaray
Dhabtii gacan wayn i siiyay
Adaa gudcurkaan ku jiray
Iyo godkii baas mar hore
Guntiisii iga soo baxshoo
Runtana igu sii gardaadshay

Anigu kama gaabin doono
Inaan gabbaldhaciyo waaberi
Ammaantaada gaar ahaaneed
Qasiiddiyo gabay ka tiriyo

Rabbow adigaa hadiyo goor
Gaashaan iyo wehelba ii ah
Adaa nolol guul xambaarsan
Iyo galladda iigu deeqay
Oo aan marna gudi karaynin
Haddaan kun gu'yaal ah sii jiro

Anigu kama gaabin doono
Inaan gabbaldhaciyo waaberi
Ammaantaada gaar ahaaneed
Qasiiddiyo gabay ka tiriyo

WAXAAN HUBAA GEERI DABADEED

Amin A. Ahmed

Haddaan galladdiyo nimcada
Si dhab ah u garwaaqsanaayo
Oo aan galab iyo habeenba
Gabanka Eebena la joogo

Marnaba gulufkaa cadaawuhu
Imaba baqdin gelin karaayoo
Gaashaan bir ah baan sitaaye

Waxaan hubaa geeri dabadeed
Inaan guulaysan doonoo
Martina u ahaanba Guulle

Hadduu mar kastaba gargaaruhu
Intaa garabkayga joogoo
Runtana igu sii gardaadin
Oo aan degay guri barwaaqo

Marnaba gaalkiyo Iblaysku
Iimaankaygaan godladay
Ma gaagixin karaan iyagu

Waxaan hubaa geeri dabadeed
Inaan guulaysan doonoo
Martina u ahaanba Guulle

MAANTABA GOB BAAN AHAY

Amin A. Ahmed

Gumaysigii Iblayskiyo
Gunnimo waan ka tegayoo
Maantaba gob baan ahay

Galladdiisa Eebahay
Geedkii ka baxay baan
Fadhiyaa guntiisoon
Miro wacan ka goostaa

Ma hawl galo dharaartii
Mana gam' o habeenkii
Anigoon gacmaha sare
Ugu taagan Guullahay
Mahad iga guddoon oran

Gudcur waxaan ku soo jiro
Xaq gariif ahaadaba
Runtii baan garwaaqsaday

Goor iyo ayaanna
Gargaarkii Ilaahay
Nimcadaan ku gaaraan
Ka go'aynin laabtee

Ma hawl galo dharaartii
Mana gam' o habeenkii
Anigoon gacmaha sare
Ugu taagan guullahay
Mahad iga guddoon oran

WELIGAA I GARAB QABO

Amin A. Ahmed

Laabtayda oo guran
Markaad Gabankii Eebow
Ku godlisay Injiilkaan
Degay guri nabdoone

Galladdii aad i siisay
Haddii aanan guddoomin
Maanta libin ma gaareen
Gudcur baan ku jiri lahaa

Gargaarkaaga Ciisow
Gelin kastaan u baahnee
Weligaa i garab qabo

Abaal saaxib loo galo
Nafta goorta loo huro
Midda ugu gudboonba
Inay tahaan garaystaye

Adiguna geddaas baad
Gefafkaygii awgood
Geeri aanad mudnayniyo
U soo gashay xanuunkee

Gargaarkaaga Ciisow
Gelin kastaan u baahnee
Weligaa i garab qabo

KUWAA GAALOBAY OO IDIL

Amin A. Ahmed

Anigu gooriyo ayaanba
Waxaan u galaa socdaalka

Iblaysku duulkuu go'doonshay
Gudcurka baas weli ku sii jira
Xaqiyo garanayn Masiixaba
Inaan gaarsiiyo eraygee

Guulow adigaa awood lehe
I sii xikmad aan guraynoo
Kuwaa gaalobay oo idil
Gargaar ugu fidin karaayo

Anigu waxaan gu' iyo jiilaal
Gucliyo orod ugu jiraaba
Sidaan gacmahaa Iblayska
Guutooyin uga soo xoraynlaa
Dabeed galladdiyo nimcada
Ka gurta mirahaba u oranlaa

Guulow adigaa awood lehee
I sii xikmad aan guraynoo
Kuwaa gaalobay oo idil
Gargaar ugu fidin karaayo

ADOON GEES KALE U LEEEXAN

Amin A. Ahmed

Adoo guulle kuu nimceeyay
Caqligiyo garaad wacan ku siiyay
Haddaad xaq gariife noqoto
Inaad tahay ruux gurracani
Kollay waad garan kartaaye

Adoon gees kale u leexan
Masiixii loo gigay daraaddaa
Xaggiisa u soo gurguuroo
Isaga galabtaba rumayso

Adoo gallad waynba haysta
Nolosha Rabbi kugu gargaaray
Inaad xaqa garab martood
Dhalanteedkana u guuxdo
Sow maaha caasinimo geddeedii

Adoon gees kale u leexan
Masiixii loo gigay daraaddaa
Xaggiisa u soo gurguuroo
Isaga galabtaba rumayso

GOCONDHADA IYO SARREENKU

Amin A. Ahmed

Marnaba ha u guuxin weligaa
Dembiguu kaa galay walaalkaa
Inaad goob kasta ka sheegtood
Gar mooddo inay xaq tahay taa

Waxaase marka hore gudboon
Si gaar ah inaad u kulantaan
Dooddana la gorfayso kelidii

Haddiise aanu kaa garbixin
Arrinta qaar kale u geeyoo
Idiin kala gura markaasoo
Gunaanad u yeela xaajada

Xil maaha guudkaaga saaran
Inaad dadka kale gefkoodii
Garsoore xukumaaya noqotee
Goor walba ka adkaw naftaada

Illayn guud ahaan walaaluhu
Ma wada aha gobtii Masiixee
Qaar baa ka gumoobay hoostee

Gocondhada iyo sarreenku
Gebi haysla wada baxeenoo
Guullaa kala sooci doonee
Ka gaabso kala saaristoodii

U GUNTO HAWLIHII MASIIXU

Amin A. Ahmed

Waa inaad garataa dunida
Adoon guunyaba lahaynoo
Runtii qaawanoo go' sidan
Inuu Guulleheen ku keenay

Maantoy gebagebo marayso
Adoon sii daba guclaynin
U gunto hawlihii Masiixu
Gudo kugu yiri dhammaantood

Hadduu kaa dhaco gef wayna
Walaacba adoon is gelinin
U soo noqo gabankii Eebbee
Guushiyo nolol kuu horseeday

Garwaaqso inay naftaadu
Geeriyo dhimashaba sugayso
Goor ay noqotaba adduunka
Looga sii gelbin doono aakhiro

Intaan gabbalkeedu uu dumin
Gogosha ka kacoo ka toosoo
U fidi gurmada hagar la'aaneed
Kuwaan xaqa garanin weligood

Kolkuu gaabis kugu yimaaddo

Gees kale adigoon u bayrin
Laabtaba geli inuu Masiixuba
Mar kasta garabkaaga joogo

GALLADDII AY HANTEEN DARTEED

Amin A. Ahmed

Qiyaamaha kolkii la gaaro
Garsoorahu yahay Masiixu
Wuxuu gabbalkoodu dumay
Dhammaan gaaladii dafiray
Inuu yahay Gabankii Eebbe

Waxaase guulaysan doono
Guutooyinkii raacay oo idil
Galladdii ay hanteen darteed
Nolosha weligeed ah gelayee

Aakhiro waa guri xisaab taal
Iblaysku kuwuu gardaadshay
Masiixa ka gees ahaa baan
Gefkiyo demigoodii awgii
Si fudud uga gudbi karaynin

Kuwii ku xirnaynse Guulle
Gargaar bay heli dharaartaa
Nimcada geedkeedii baxay
Ayay miro ka goosan doonaan

MASIIXIYADDU WAA U GUUL

Amin A. Ahmed

Galladiyo barwaaqada

Waxaa bixiya Guullee

Maan-gaabku waa gaar

Ruuxii garaad lihi

Wuu garanayaayee

Masiixiyaddu waa u guul

Inta Gabankii Eebbe

Galabtaba ku xiranoo

Guuto raacday noqotaye

Runtii guriga Aabbaha

Nimco aan gurayniyo

Nolol go'ayn inay taal

Weli doqon gadoodiyo

Gaaladay u muuqanin

Masiixiyaddu waa u guul

Inta Gabankii Eebbe

Galabtaba ku xiranoo

Guuto raacday noqotaye

XAQA INAY GARTAANE

Amin A. Ahmed

Gaaladiyo Iblayska

Ruuxa daba gucleeyoo

Masiixaba ka gees ah
Liibaan gaari maayoo
Godka Naarta mooyee
Geli maayo Jannadee

Wacdigaan gudbinayana
Waxaan uga gol leeyahay
Kuwa gudcurka fadhiyee
Injiilkaba gariifay
Xaqa inay gartaanee

Wadaad xume gar wayniyo
Kuwa maryaha gaabsadee
Gaalnimada caddaystay
Ruuxa gacal u mooday
Xagga Eebbe gallad iyo
Gargaar kama helaayee

Wacdigaan gudbinayana
Waxaan uga gol leeyahay
Kuwa gudcurka fadhiyee
Injiilkaba gariifay
Xaqa inay gartaanee

GOGOSHII BADBAADADA

Amin A. Ahmed

Goortii la fidiyay
Gogoshii badbaadada
Kii garasho dheeraa

Deg-deg buu u soo galay

Caqli gaabkii jirayse
Wuu ka gaws adaygoo
Diiday inuu guddoomo
Gallad isaga loo siday

Qofba geedkii beertuu
Illayn miro ka goostaa
Guushase waxaa leh
Kuwaa Gabankii Eebbe
Rumeeyee u soo go'ay

Galabtii uu iftiin baxay
Gaaray dunida oo dhami
Kuwaa gudcurkay ku jireen
Ka soo guuray oo nacay

Qaar Iblayskii gabay bay
Sii daba gurguurteen
Gargaarkii Ilaah bay
Gaalnimo ka doorteen

Qofba geedkuu beertuu
Illayn miro ka goostaa
Guushase waxaa leh
Kuwaa Gabankii Eebbe
Rumeeyee u soo go'ay

GUULLOW MARNA KUMA FARXAYSID

Amin A. Ahmed

Tukuhu illayn kama gaboobo
Inuu durbo gembiiyo weelkii
Kolkaa calafkuba u geeyay

Sidoo kale gaaladoo dhan
Galladdii uunka loogu deeqay
Geedkeedii baxaayay bay
Inay runtii miro ka goostaan
Iyagu ka gadoodayaanee

Guullow marna kuma farxaysid
Midkood inuu naarta galo ee
Kuwa gefay idil ahaantood
Xaqay diidayaan bal garansii

Ruuxaa nafsaddiisii gabay
Geelii uu dhaqan lahaa iyo
Gurigii waxba uma taraayee

Sidoo kale Gabankii Eebbe
Kuwa u guntaday naciisii
Garaad xumo aawadeedna
Halkay guusha hanan lahaayeen
Ayay dhabtii gudcur ka doorteen

Guullow marna kuma farxaysid
Midkood inuu naarta galo ee
Kuwa gefay idil ahaantood
Xaqay diidayaan bal garansii

GAALNIMO KA XOROOBAY MAANTA

Amin A. Ahmed

Ruuxay galladi u darartoo
Waxaan ahay goor kastaba
Ku xiran Guullehii abuurro
Gefkiyo xumahana ka tegayoo
Shaydaan xariggaba u gooyay

Gaalnimo ka xoroobay maantoo
Xaqii baan godol maalayaayoo
Dhalanteedkaan ka guuray
Gadaal dambe uguma laabto

Waxaan ahay Gabankii Eebbe
Mid uu gaashaan u yahayoo
Iblayskana gaadmadiisiyo
Ka feejigan gudcurkii baasiyo
Dabintii aan galay mar hore

Guushaa ii curatay maantana
Inaan gembiyoon ka tago
Ammaanta Ilaah ka gaabshana
Gu'yaal kale lagama yaabo

INUU GO'AY HA MOODINA

Amin A. Ahmed

Ruuxa Gabankii Eebbe

Dartii loo gumaaday

Kolkuu geeriyoodo

Inuu go'ay ha moodinee

Ugu tiriya guul iyo

Inuu jannadii gelayee

Waana gallad Ilaahay

Xerta gebi ahaanteed

Mid u gaar ah uga dhigay

Kuwa godadka loo qoday

Ciise awgii loo gubay

Waxay guri ku leeyihiin

Guulle wayn agtiisoo

Galab iyo habeenba

Farxad ugu gam'aanee

Waana gallad Ilaahay

Xerta gebi ahaanteed

Mid u gaar ah uga dhigay

GUULLOW ILAAH

Y. B. Xirsi

Guuloow Ilaah

Xerla gaadayoo

La go'doomiyoo

God uun lagu ritaan

Ka gadoodsan nahay

Gaaridii laqabay

Gabantay dhashiyo

Geesiyoo Maxamed

Godka lagu ritaan

Ka gadood sanahay

Guuloow Ilaah

Gacmo hoorsanoo

Kuu magan gallee

Gurmad soo furfura

Gacantaada sii

Dambi gaara iyo

May galin xumaan


Jacaylkaagan galay

Gaadh siin Ijiil

U galeen xabsiga

Guluf iyo dagaal

Xertan loo guddiyay



La go'doomiyaan
Gurmad caawiyiyo
Malagyada u gee

Guuloow Ilaah
Gacmo hoorsanoo
Kuu magan gallee
Gurmad soo furfura
Gacantaada sii



F



FAAFIYOO U SHEEGOO

Abwaan A. K. Q. Dictionary

Fariimahaad taqaanaan

Dadka faraha badanee

Fiirinaaya guusha

Faafiyoo u sheegoo

Fahan siiya Eraygoo

U furfura Kitaabkoo

La wadaaga farxaddoo

Wax kastooy filaayaan

Fagaaraha u taagyiin

Fududeeya waligiin



Q

QUDDUUSNIMO KU SII JOOG

Amin A. Ahmed

Quursiga midnimadiyo
Kala qaybsanaantaba
Marna inaanay qummanayn
Masiixaa qarniyo tegay
Si cad noogu qeexaye

Afka waxaan ka qiranno
Qalbigaba hadduu jirin
Inaan khayrba hananno
Qiilba looma heli karo

Intuu dhicin qiyaamuhu
Qof walbaw naftaada
Xarig bir ah ku qabo oo
Qudduusnimo ku sii joog

Siduu qoray Injiilku
Kibirkiyo is qaadqaad
Waa dembi qabwaynidu
Rumaystaha qalloociyo
Khatar waynba gelisee

Haddaan qallafsanaanno
Qaddarin wayno aadmiga
Qawlkii uu Masiix yiri
Ayaan qiimo jebinnaa

Intuu dhicin qiyaamuhu
Qof walbaw naftaada
Xarig bir ah ku qabo oo
Qudduusnimo ku sii joog

MASIIX SOO QAABILOO
Y. B. Xirsi

Adduunyadu waa qiyaas
Cimriga qaybtaad lahayd
Ayaa qalin kuugu dhigan

Malagga nafta qaadayaa
Intuu qunyar kuu yimaad
Ayyu qasab kaaga jari

Qaraabiyo ehel dhammaan
Intay qayd kuu jaraan
Ayay dhoobo kuu qasaan

Intaadan qaxar kaasi galin
Masiix soo qaabiloo
Walaal qoyskiisa noqoo

Qiyaamuhu waa dhawaan
Dadkoo wada qaawanoo
Wixii buugta loogu qoray
Xukunka qaybta loogu sii

Intuu qiil towbad jiro
Intaad qaadataan Injiil
Rabbiga wada qaabishaan
Rumayntiisa kaalay qira

Intaadan qaxarkaasi galiin
Masiix soo qaabiloo
Walaal qoyskiisa noqo

WADA QIRA ILAAH

Y. B. Xirsi

Addoonkii is qaadee
Qoortiisa taagaba
Qasab wuu dhacaayoo
Naar qiiqda hoos geli
Qiilna loo helayn abid
Qof waliba wuxuu dhigo
Qalin baa xisaabaad
Buugtiisa lagu qoray

Wada qira Ilaahoo
Qawlkiisa raacoo
Intaad qiimo bixisaan
Qoyskiisa wada noqo

Digniin qaaliyoon sido
Wada qaata maantoo

Qalbigiina wada geli
Qoomkaan Masiix qirin
Qaybta raacda shaydaan
Maalintaa qiyaamaha
Bado qooqay oo kari
Wax qaboojiyaa jirin
Qasab bay ku hoos geli

Wada qira Ilaahoo
Qawlkiisa raacoo
Intaad qiimo bixisaan
Qoyskiisa wada noqo

CASHAR WEEYE QAALIYA

Y. B. Xirsi

Qoom walibaa adduunyadan
Wixii uu qorshaystaa
Midhihiisa qaataa

Qisooyinkii horreeyiyo
Taariikhdan wada qoran
Cashar weeye qaaliya

Janno qiimo waawayn
Qoyskii ku noolaa
Amar qaata lagu yidhi
Dame iyo qabkoodii
Geedkii ku quuteen

Qaska iyo dunuubtii
Sharaftii ka qaadoo
Inay qaawanaayeen
Qasab bay ogaadeen

Qaaddiroow Ilaahay
Naxariis qabaw badan
Qurbaan nooga dhigay Wiil

Qoomu Nuux markoodii
Kibrayee is qaadee
Intay qooqanaayeen
Biyo lagu qarqiyayee
Qoyski Nuux ka soo hadhay

Qorshihii Ilaahay
Barakooyin qaaliya
Qaadir bawgu deeqoo
Quruun aad u xoog wayn

Qorshe samaada lagu tago
Damac baa ku qaadoo
Qasmoo kala hallaaboo
Afkood qaybo kala noqay

Dambi waa qadhaadhoo
Quruxduu halleeyaa
Qaaddiroow Ilaahay
Naxariis qabaw badan
Qurbaan nooga dhigay Wiil

QORA OO ADKEEYA
Abwaan A. K. Q. Dictionary

Qalinkiyo Kitaabkuba
Waa qoraal runtii qira
Qiimaha Kitaabkuna
Qiimiyo wanaag buu
U qalmaa dadkaygoow
Bal qiyaas wuxu faray
Qoomkii addeecce
Qaatee akhriyi jiray
Qalad way ka dhaarteen
Qushuuc iyo wanaagbay
Qayrkood ku dhaafeen
Qolo kalana waxay tidhi
Quus yeynu noqonine
Qofka hela Kitaabkaas
Qaato dadkoo idil
Ku qaabila bartoodoo
Fahansiiya qodobada



K

KANIISADDII MASIIXEE

Amin A. Ahmed

Kaniisaddii Masiixee
Butros lagu kor dhisay baa
Ka mid noqoshadeedii
Kaafisay naftaydoo
Gudcur iga kaxaysay

Kaah iyo iftiin buu
Rabbi keenay dunidee
Kuwa aan arkayn baa
Runtii weli kadeedane

Kaalmada Masiixa
Kolla lagama maarmee
Koonka inta ku noolna
Qof kastoo rumaystaba
Kurbaduu ka qaadaa

Nolol kaamiloo go'in
Lagu wada kifaaxuu
U kaydiyay xertiisee
Kaan ogayn ayaa lumay

KURAYGAAGII BAAN AHAY

Amin A. Ahmed

Rabbow kaalmadaadii
Mar kastaan u baahnoo

Kama maarmi karayee

Kadeed iyo rafaadiyo

Iga dhawr kurbiyo ciil

Kuraygaagii baan ahay

Kugu qaba kalsooniye

Kufrinimada idilkeed

Iga kori hadiyo jeer

Nimcadii aad keentay

Markii aan kabbaday bay

Kasha iyo laabtaba

Kulaylkii gubaayiyo

Kaarkuba ka duulayee

Kollay Adi la'aantaa

Farxad kuma negaadeen

Ku baryaye Allahayow

Iga kaxee shar idilkeed

QOFKA HELA KITAABKAAS

Abwaan A. K. Q. Dictionary

Kumanaan dadyoowa

Ku tusaale qaatoo

Kulligood arkeenoo

Kartidiisa Boqornimo

Kolkii ay layaabeen

Wuxu tusay Kitaabkii

Kol kaasuu u sheeguu

Ku dhawaaqeen Aabbow
Kol kaasay dhammaantood
Ku dhaheen Masiixoow
Ku rumaynay adigoo
Kugu raacnay waxaad tahay

INTAAD RABBI KAASHATAAN

Y. B. Xirsi


Dadkoo wada qaba kadeed
Gargaar kaalmeeya jirin
Masiix keligii u yimiid

Wanaag baa lagu koraa
Nimacada lagu kaydsadaa
Ku taga guushiyo xaqnimo

Intaad Rabbi kaashataan
Dhamaan kibir daadisaan
Toobada kuligiin qabsada

Kaalmeeyuhu waa Ilaah
Kuwii dambigooda qira
Injiil kuligiis aqbala
Ayu ku shubaa nimcada

Qabyaaladdu waa kadeed
Bulshada kala qaybisoo
Kuridda halis aad u daran



Midnimo kaamiloo la helo
Wanaag barakaad ku heli
Sayidku kula doonayaa

Intaad ka taktaan xumaan
Xaqnimo wada kaashataan
Ku shuba qalbiyada Injiil

Korreeyuhu waa Ilaah
Kuwii dambigooda qira
Injiil kuligiis aqbala
Ayu ku shubaa nimcada


KORREEYOOW MASIIX

Y. B. Xirsi

Anigoo kadeed
Kurbo iyo xanuun
Kaar seexanayn

Habeen sarakacoo
Subaxdii kalaha
Kun halaag ku jira

Kalmadaydu tahay
Kan i maamuloow
Kollay ii dhawide
Rabbiyoow kumee?



Kaymo bahalku galo

Anigoo kadlayn

Kaacaa kufaa

Korreeyoow Masiix

I kaalmeeyayoo

Kaahiisi yimid

Ruux kaamiloo

Kayd ii sidaa

Rabbi keenayoo

Waan keefayaa



L

XAQU IGU LINKAXAN YAHAY

Amin A. Ahmed

Dembigaan la liicee
Muddo igu lamaannaa
Kolkii layga rogay baan
Nafta wixii luraayiyo
Ka lib keenay dhimashadi
Aan la hoyan lahaaba

Imminkoon ladnaaday
Xaqu igu linkaxan yahay
Iblays ima lug goyn karo
Dibna iima lumin karo

Leexadii i sidatayee
Cidlada igu lulaysay
Nasri inay lahayn bay
Laabtaydu garataye
Dabeed Madigii loo bogaa
Liibaanta igu hagay

Imminkoon ladnaaday
Xaqu igu linkaxan yahay
Iblays ima lug goyn karo
Dibna iima lumin karo



M

MARTI IYO U AHAY MAGAN

Amin A. Ahmed

Masiibada adduunyadu
Hadday igu dul meerto
Nacabkaygu maantana
Waran iyo masaariyo
Mindiyo ii afaystaba

Masiix dafiri maayoo
Waa mid maanka iga yaal
Marna aan ka go'i karin
Aan u qabo mixibbo wayn

Maalin qurah naftayduna
Ma dareento murugadoo
Kan i maamulaayaan
Marti iyo u ahay magan

Haddii uun laygu maago
Magaca Wiilka awgii
Inaan farxaba mooyee
Marna lagama yaabo
Caro inaan u meel dayo

Macallinkii Injiilkaa
Horay iigu macneeyay
Inuu samirku maaliyo
Yahay mirihii nabaddee

Anba moogis uma qabin
Marinkii runta ahaa
Xagga Eebbe loo maro
Ciise Masiix inuu yahay

DEMBIILIYO MID DAAHIRA

Amin A. Ahmed

Maalintaa qiyaayamaha
Madax walbaba tiisaa
Loo marin xisaabtoo
Cid cid kale mas'uul ka ah
Maanka geli inay jirin

Ayaantaa Masiixaa
Dembiliyo mid daahira
Kalaba miiri doonee

Qaarka midigta loo dhigee
Arki doona Mawlaha
Muska inaad la joogtaan
Ku dadaala maalmahan

Mawdka lama huraayoo
Waa mid noolahoo idil
Mar uun taaban doonoo
Inta marin habawday
Waa u mugdi xabaashuye

Masiixase kuwiisii
Dhibba kuma mutaystaan
Iyo murugo toona

Qaarka midigta loo dhigee
Arki doona Mawlaha
Muska inaad la joogtaan
Ku dadaala maalmahan

MA HURAANKII BAAD TAHAY
Amin A. Ahmed

Masiixaan jeclaayow
Miciinkii naftaydow
Taaj aanan mudan kii
Madaxayga surayow

Ruuxaad midigta qabatay
Inuu marin habaabayn
Muran kamaba taagnee

Ma huraankii baad tahay
Dhabtii muxibbadiisii
Oo ay maanka iga taal
Marna aan ka tegi karin

Madaxfurasho qiima leh
Oo aan abidba moogaa
Aadaa igu manaystoo

Mid xoroobay iga dhigay

Ruuxaad maamulaysana

Inuu mooro baas galo

Mustaxiilba weeyaan

Ma huraankii baad tahay

Dhabtii muxibbadiisii

Oo ay maanka iga taal

Marna aan ka tegi Karin

MAS’UULIYAD BAA KU SAARANE

Amin A. Ahmed

Qofna uma shido musbaax

Inuu hoos geliyo miiskoo

Muraadkii laga lahaabaa

Illayn meeshaba ka baxayee

Macnaha waxaan uga socdaa

Adoo ah xertii Masiixa

Dadkuse weli uu ku moog yahay

Mas’uuliyad baa ku saarane

Injiilka sideed u meel marin

Hadday dhadhan beesho milixdu

In layskaba tuuro mooyee

Muraad kale lagama yeeshoo

Muskaba waa laga fogeeyaa

Geed walboo aan miro dhalayna
Gudin baa meel u sii taal
Qofkii xaqa maro dul saaroo
Dunida uba muujin waayana
Cadaab daran buu mutaystaa

MAGACAAGA SHARAFTA WAYN LEH

Amin A. Ahmed

Masiixow erayadaadii
Anigu waan mahadiyaayoo
Ku maareeyaa nolosha

Qofkase aan garan macnaha
Waa mayd iska soconayoo
Iblays la mataan ahaaday

Muranse waxaa uu ka taagnayn
Inuu maalintaa qiyaamaha
Xisaab daran uu maraayoo
Dhimasho weligeed ah

Magantaada inaan ku jiro
Miciin ii tahay hadiyo goor
Anigu maalin iyo habeenba

Maankaygaan kugu hayaayoo
Muxibbadaan kuu qabiyo
Jacaylkaagu igama mayrmo

Meel kastoo aan dhigo cagaha
Mar walbo inaan sare u qaado
Magacaaga sharafta wayn leh
Ayaan ballan adag ku maray

CID KASTOO MURAAD KA LEH
Amin A. Ahmed

Midnimo inaan ku joogno
Isku maan ahaanno
Muxibbana qofkeenba
Midka kale ku sooro

Mar kastana walaalahu
Muran kaba fogaadaan
Masiix baa na faray taas

Masiixiyaddu waa aqal
Mugdi aan lahaynoo
Marinkeedu furan yahay
Cid kastoo muraad ka leh
Loo macnayn karaayee

Carmal mininka joogtiyo
Miskiinkiyo agoonkaba
Waxay midigta haysoo
Eebbe nagu mannaystay

Inaan laga masuugin
Oo loo wada miciino

Mabda'eenu weeyaan

Masiixiyaddu waa weel

Malab uu ka buuxoo

Mar ninkii dhadhamiyana

Macaankeedu qirayoo

Meelna uga dhaqaaqayn

AYAAN MUGDIGII KA BAXAY

Amin A. Ahmed

Masiixu hadduu i doortay

Uu yahay kan i maamulaaya

Mooradii nimcadaan dhex joogaa

Anigu murugoonba maayo

Maalintaan helay badbaadado

Dunuubtaan galay la mayray

Ayaan mugdigii ka baxayoo

Iskaga tegay mininkii Shaydaan

Waxaa mahaddaa iska leh

Mawlihii galladdaa i siiyoo

Inankiisii madiga ku ahaa

Dartay mawdkaba u quuray

Injiilka markaan aqriyay

Oo aan macnahiisii dhuuxay

Ayaan iska moosay goortaa

Beentii lay meerin jiray

Kolkaasaan marinkii toosnaa
Anoon ka murmaynin raacay
Shakina meel iskaba saaray
Iyo noloshii madoobayd

Waxaa mahaddaa iska leh
Mawlihii galladdaa i siiyoo
Inankiisii madiga ku ahaa
Dartay mawdkaba u quuray

KUWA NEBIYADA IS MOODAY

Amin A. Ahmed

Qaar baa mugdigiyo iftiinka
Marnaba kala sooci karinoo
Intay iska male-awaaleen
Waxay maskaxdoodu doontiyo
Si kale u macneeya eraygee

Waxay maankase ka xadayaan
Mid kastoon feejignaynoo
Noloshiina ku maarayn
Injiilkan macaanta badan

Kuwaa nebiyada is mooday
Iyo macallimiinta beenta ah
Intaanay ku marin habaabin
Xisaabi naftaada maantaba

Masiixa wuxuu sii tilmaamay
Qaar inay magaciisa jinniyada
Meel kasta ku canaan doonaan
Weliba mucjisooyin badan
Aadmiga ku hor muujin doonaan

Markuuse soo noqdo agtiisa
Maamuus kuba yeelan doonin
Munaafaqnimadooda awgeed
Ku oran iga mara bannaankaa

Kuwaa nebiyada is mooday
Iyo macallimiinta beenta ah
Intaanay ku marin habaabin
Xisaabi naftaada maantaba

RABBIGA MAHADDIISA WEEYAAN

Amin A. Ahmed

Anigoo marin been ah raacay
Shaydaanku i maamulaayo
Kolkuu Eebbe ii miciinee
Dhiig qaaliya laygu mayraan
Dembiga muragadii illaaway

Rabbiga mahaddiisa weeyaan
Haddii aan mirihii nimcada
Anigu guranaayo maantoon
Ka baxay mugdigaan ku jiray

Maankaygu wuxuu xoroobay
Masiixa kolkaan rumaystay
Naftuna waxay muranba daysay
Injiilka markii ay dhuuxday
Xaqaba inuu muujinaayo

Rabbiga mahaddiisa weeyaan
Haddii aan mirihii nimcada
Anigu guranaayo maantoon
Ka baxay mugdigaan ku jiray

MAANTANA NIMCADAAN KU JIRO

Amin A. Ahmed

Anigu maalintaan badbaaday
Ayay murugadii i daysay
Iblayskii i marin habawshay
Wuxuu ii meerin jiray iyo
Ka tegay maaweeladiisii

Rabbow mahaddaa adaa leh
Mugdigii iga soo baxshoo
Dembigii muddo igu rarnaa
Iga mayray idil ahaantii

Madmadaw xaqii igaaga jiray
Runtiisii markaan ogaaday
Ayu maanku ii qaboobay
Maantana nimcadaan ku jiro

Ma aha mid la koobi karayee

Rabbow mahaddaa adaa leh

Mugdigii iga soo baxshoo

Dembigii muddo igu rarnaa

Iga mayray idil ahaantii

KOLKAA BAY MUUQAN DOONTAA

Amin A. Ahmed

Haddii aanay jirin midnimo

Maqaarsaar yahay jacaylku

Weliba muran iyo dagaal

Muskeenna ka oogan yahay

Sidee baynu maanta dunidaa

Mugdiga ku jirtee hallawday

Miciin ugu noqon karaynaa

Waa inaan marka hore qalbiga

Naciyo xumahaba ka mayrnaa

Inaan nahay kuwii Masiixana

Kolkaa bay muuqan doontaa

Haddaynu kala maan ahaanno

Mid walba qaado marinkuu doono

Ka baxo wadajireenu meeshaba

Magacyo badan kala lahaanno

Mus'uuliyaddaan xambaarnay

Madmadaw iyadoo aan gelin
Sideen maalmahan u gudannaa

Waa inaan marka hore qalbiga
Naciyo xumahaba ka mayrnaa
Inaan nahay kuwii Masiixana
Kolkaa bay muuqan doontaa

QIYAAMAHA MARKII LA GAARO

Amin A. Ahmed

Adduunka markii la rogo
Waxaa muran aan lahayn
Inay jirto maalin aadmigu
Xisaab daran uu maraayoo
Qof walba wixii uu mutaystay
Masiixu ku qaadi doonee

Maxaad dhigatood qiyaamaha
Dharaartaa murugadeediyo
Masiibada kaa badbaadin

Haddaad maankaba ku hayso
Weliba aad qiran Masiixu
Inuu yahay madigii Eebbe
Dartaa silacaba u maray
Mas'uuliyadduu ku saaray
Hadday kuu muuqan waydo

Qiyaamaha markii la gaaro
Ayaad ka filan miciiniyo
Hiil inuu maalintaa ku siiyo

MUNAAFAQNIMADU WAA HALIS

Amin A. Ahmed

Sidii ruux muraayad

Ka hor muuqday oo kale

Wuxuu arkay markaaba

Dib u milicsan waayiyo

Maangaab ha noqonine

Silac kastoo Masiixuba

U soo maray daraaddaa

Adoon safaad u moodayn

Waa inaanad moogaan

Maskaxdana ku haysaa

Waa kii micidii Shaydaan

Mawdkii kaa badbaadshee

Mahad inaad u celisaa

Maanta kugu habboonee

Sida ruux macaankiyo

Malab loo hibeeyay

Mar uun leefay oo kale

Masaalkii ha noqoninee

Dacartana ha muudsanin

Masiixii ku doortaa

Adigoon mutaysanin

Nimco kugu mannaaystee
Gudcurkiyo mugdigii baas
Mar kale ha ku hungoobin

Munaafaqnimadu waa halis
Qofka meel xun gaysee
Xaqaad marinkii raacday
Mabda'iisi ha ka tegin


MAHASANID MASIIX
Y. B. Xirsi

Maalintii adkayd
Murugiyo xanuun
Xerta miyirku tagay

Mulkigii dunida
Masiixii lahaa
Baabacada musbaar
Looxa loogu muday

Meel kastaba dunuub
Intuu maydhay buu
Maalin nooga dhigay

Ciisoow Masiix
Mahad iyo amaan
Adigaa mutoon
Kuu miisnayee
Mahasanid Masiix



Maalin iyo habeen
Meelkastaba adaan
Kuu magan galloo
Na maamulee
Kaalay noo miciiin

Mudadii horiyo
Noloshii madhnayd
Mugdi iyo xumaan
Dhex meeraysan jiray

Wax la soo murxaba
Maqaamkii Janada
Miiddaan gallee
Masiix baan helloo
Waan mahadinaa
Oon magan gallaa

Ciisow Masiix
Mahad iyo amaan
Adigaa mutoon
Kuu miisnayee
Mahasanid Masiix



N

NASIIBSE WAXAA LEH MAANTA

Amin A. Ahmed

Noloshu way kooban tahayoo

Naftuna geeri bay u joogtaa

Nacaskuse wuxuu u moodaa

Inuu ku negaan adduunkoo

Naxashba lagu qaadi doonin

Nasiibse waxaa leh maanta

Nuurkaa baxay ruuxa haysto

Nasriga Eebbe aawadiisna

Masiixa naxli li'i rumeeyay

Dad baa farxaddaba ka naawila

Meel aanay naruuro oollin

Jidkii nabaddana ka rooroo

Nimcaday ku bogsoon lahaayeen

Iyo khayrka naca hadiyo jeer

Nasiibse waxaa leh maanta

Nuurkaa baxay ruuxa haysto

Nasriga eebbe aawadiisna


Masiixa naxli li'i rumeeyayv

HAW U NUGLAANIN ABIDKAA

Amin A. Ahmed

Waa nacab Iblaysku

Ku naanaabinaayoo



Oggolayn nimcadiyo

Inaad aragto nuurkee

Haw nuglaanin abidkaa

Ka fogow naxliga baas

Iyo nacuu ku geliyay

Wuxuu naawilaayaa

Inaad bohosha naarta

Ehelkeeda noqotood

Ku negaatid weligaa

Iblays siday naftaadu

Naqa da'ay Injiilkiyo

Galladdaba u nuugin

Ayuu kuugu naban yahay

Ma oggola nasriga iyo

Inaad nolosha weligeed

U yeelato nasiib wacan

Wuxuu naawilaayaa

Inaad bohosha naarta

Ehelkeeda noqotood

Ku negaatid weliga

INJIILKU NARUURO WEEYAAN

Abwaan A. K. Q. Dictionary

Naxariista Rabbaan rumaynee

Nasriga roobkaan rajeynee

Niyadda furan baa raxmadee

Nabdiga galiya gugoo da'ay

Naflayda Rabbaa u roon abidoo

Nasteexada noolahaa raba oo

Naruuro kastood u rooraysaan

Niyeysta Masiix markaad oontaan

Nimcada kuligeed Ciisaa maamulee

Niyadda geliyoo shugriga badiyaay

Nin iyo naag raaca Erayga

Nacas baan baranayn Baybalka Rabbige

Naftaa u baahan Ilaaheedee

Nabsi yaan laga gelin ogaada e

Injiilku naruuro weeyaanee

NIMCAALOOW MASIIX

Y. B. Xirsi

Nabad iyo barwaaqiyo

Nimco aan dhammaanayn

Naxariis Ilaahay

Nolol waarta abidkeed

Yaanu naawilaynaa

Nimcaaloow Masiix baa

Farxad lagu nagaadiyo

Naruurooyin kala daran

Naqu meesha uu helay

Nabad lagu caweeyaa

Nuxuustii adduunyada

Dambiyadu nugleeyeen

Nuurkii Ilaahee

Nafta noogu deeqoow

Noloshaydu waa adi

Shaydaanku waa nacab

Cudur iyo nuxuus daran

Kugu wada nusqaane

Nabad kaa kaxaynoo

Naar kugu xereeyaa

Ciise waa nafteenoo

Ruuxa nolosha keeniyo

Nimcadiisan yaab kale

Aad nala wadaagtide

Nuurkiisan daawada

Nuxuustii adduunyada

Dambiyadu nugleeyeen

Nuurkii Ilaahee

Nafta noogu deeqoow

Noloshaydu waa adi



W

WARMO HAYGU GOODDIYIN

Amin A. Ahmed

Geeri kama welwelayoo
Hadduu wedkaygu soo galo
Waxaan hubaa halkaan tegi
Ee uu nolosha weligeed ah
Waaqow iigu diyaarshay

Wakiillada Masiixee
Waddadiisii qaaday
Cabsi way ka dheer tahay

Haddaba kaagan waashow
Waxba seefta baasiyo
Warmo haygu gooddiyin

Silac iyo waxyeelliyo
Waabaayo kama baqo
Kaan anigu weheshado
Magaciisa wacan baan
Shartoo idil ku waabshaa

Qof Masiix ku wayn yahay
Xaqa weli ku taagan
Ma walaaco abidkii

Haddaba kaagan waashow

Waxba seefta baasiyo

Warmo haygu gooddiyin

WAX WALBA U WAKIILLO EEBBE

Amin A. Ahmed

Berrito ha ka sii welwelin

Waayoo maalintuba sharkeedaa

Ku haya runtii walaac ku filan

Waxaase kuu roon adigu

Inaad waaxidkii ku uumay

Waynayso amarradiisoo

Si hufan waajibkana u gudato

Wardiga iyo salaadda badiyoo

Adigoon noqon labo wejiile

Warhooy u adeeg Rabbiga

Rabbi baa weligaa ku quudiya

Wareer ha u gelin marnaba

Waxaad berritoole cuni lahayd

Haddaad waddadiisii raacday

Iimaan waafiya lahaatay

Adoon wecweecanaynin

Wax walba u wakiilo Eebbe

Wardiga iyo salaadda badiyoo

Adigoon noqon labo wejiile

Warhooy u adeeg Rabbiga

INTAAN WAQTIGU NAGA LUMIN

Amin A. Ahmed

Waajibkaa na saarani

Haddaan waafi loo gudan

Waxyaabaha adduunka

Aan ka daba wareegno

Sow amarkii waynaheen

Kuwo wayd ka dhigayoo

Waydaartay noqon mayno

Wed baa jiree ogaada

Cidna waabin karinee

Intaan waqtigu naga lumin

Aynu wacdinno aadmiga

Waxaan nahay Masiixa

Xil wayn kuwo uu saaray

Si ay warka wanaagsani

Dadka uga waraabshaan

Yaynaan wahsiga baas

Wixii naloo igmadayba

Uga weecan awgii

Wed baa jiree ogaada
Cidna waabin karinee
Intaan waqtigu naga lumin
Aynu wacdinno aadmiga

WADAAD XUME KA SII ROOR

Amin A. Ahmed

Waddadii xaqa ahayd
Qof ka weecday abidkaa
Ha ka yeelan weheliyo
Walaal iyo sokeeyaba

Wadiiqooyin baasoo
Kuu wadi cadaab buu
Wahay kugu hoggaanshaa

Intuu Iblaysku warafkiyo
Warmahiisa kula dhicin
Qaado waanadaydoo
Ka fogow wadaad xume

Ruux wanaaggu dhibayoo
Xumaantana wadaan u ah
Waxyelladiisu badan tahay
Ood wadaagba ha la noqon

Waa nacab aan kula rabin
Nimco inaad ku waartood
Gasho nolosha weligeed ah

Intuu Iblaysku warafkiyo
Warmahiisa kula dhicin
Qaado waanadaydoo
Ka fogow wadaad xume

INJIIL BAAN WADAAYE
Amin A. Ahmed

Wadiiqooyin baaddil ah
Haddaad raacdo weligaa
Waddadii xaqa ahayd
Wahay kugu hagaynoo
Kaa weecin baa jira

Ha ku waalan ceel guran
Wadaan inaad u daysee
Injiil baan wadaayee
Waxtarkiisa ila arag

Ogoobay wadaaddada
Werinaaya beentana
Waa ay badan yihiinee
Wacdiyaha gurracani
Ka fogow warkiisaba

Weel maran sidaad tahay
Waxba yaan lagugu shuban
Aan ku waansho maantee
Wiilka Ilaahay soo raac

ANIGU WAAN U ADEEGI DOONAA

Amin A. Ahmed

Aniga oo weli dembiile ah
Ayuu Wayne iga badbaadshay
Dhimasho laga waaqsan karinoo
Illayn ah cadaabta weligeed

Jacaylkiisa waara awgii
Wuxuu ii hibeeyay noloshiyo
Galladda aan weheshanaayee

Ilaa uu wedkaygu soo galo
Anigu waan u adeegi doonaa
Intaan dhex wareego aadmiga
Injiilka la wadaagi doonaa

Dembiga oo waran dushayda
Rajadaydu tahay mid wayd ah
Ayuu Rabbi iga waraabshay
Waadiga raxmaddee aan gurin

Walaaciyo dhibtii aan qabay
Walbahaarkii intuu i daayay
Ku hirtay noloshii wacnaydee

Ilaa uu wedkaygu soo galo
Anigu waan u adeegi doonaa
Intaan dhex wareego aadmiga
Injiilka la wadaagi doonaa

RUUX CIISE WEHESHADAY

Amin A. Ahmed

Ruux Ciise weheshaday

Lama kulmo walaaciyo

Walbahaarba abidkii

Waayoo adduunyada

Iyo wax yaabaheedaba

Qalbigiisa kuma wayna

Wuxuu hiigsan ballantii

Ahayd nolosha welgeed ah

Wuuna isku hubaa taas

Ruux Ilaah wakiishaday

Waddadiisii raacay

Ma hungoobo weligii

Illayn waxaa u sii huban

Waqtii kastoo la joogaba

Inuu Masiix u yahay wehel

Waabaay la qooshay

Haddii laga waraabshana

Waxyelladeeda kama baqo

EEBBENA KA WARAABIN DOONAA

Amin A. Ahmed

Walaalahu yar iyo waynba
Hadday Waaxidkaba dartii
Warhoy isu jecel yihiin
Waxay ka baryaanba Aabbaha
Abid kama waayi doonaan

Ogow ruuxii Wiilka aaminay
Oo aan amarradiisii waydeen
Ayuu waadigii nimcada
Eebbena ka waraabin doonaa

Haddii aanan wadajirkiyo
Midnimadaba aan la wiiqin
Si dhaba laysu weheshanaayo
Weligii nac maba yimaado
Waxyellaba gaysan karayee

Ogow ruuxii Wiilka aaminay
Oo aan amarradiisii waydeen
Ayuu waadigii nimcada
Eebbena ka waraabin doonaa

WUXU SHEEGAY CIISE
Abwaan A. K. Q. Dictionary

Waxa kastood u baahato
Ama kuu wanaagaba
Wuxu sheegay Ciise
Waxad heli markaad garan
Wax kastoo aan leeyahay
Inay yihiin wanaag dhaba
Waxa jiraana ay tahay
Weheshiga Kitaabkoo
Wax kastoo la eegana
Isagaa wanaag badan
Wuxu yidhi dadkaygoow
Waligiin dadaaloo
Waxan doonayaa jano
Inaad wada dhex joogtaan



H

MASIIXII I HELAY BAA

Amin A. Ahmed

Rabbigaa i hagayoo

I hoggaaminaayee

Hootada Iblayskiyo

Handadaadda gaaladu

Habeen qurah naftaydu

Halis uma dareentaba

Waayoo hadiyo goor

Ciisaa hortaydiyo

Hareertayda joogoo

Ii hiillinaayaba

Boqotooyo hodan ah

Anoo hooy ku haystoo

Hiigsanaaya nolol wacan

Haatan siduu cadaawuhu

Iiba hodi karaayaa

Anoo hoogay oo ba'ay

Cagta saaray hilin baas

Masiixii i helay baa

Ii huray naftiisoo

Ii horseeday guushiyo

Nimcadaan ku hoos jiro

Waana hanti injiilkoo

Loo hibeeyay aadmiga

Anna inaan hirgeliyaan

Halgan ugu jiraayee

Boqotooyo hodan ah

Anoo hooy ku haystoo

Hiigsanaaya nolol wacan

Haatan siduu cadaawuhu

Iiba hodi karaayaa

WADAADDADAN HALLAWSANI

Amin A. Ahmed

Kan la marin habawshee

U harraaddan maalmahan

Inuu Ilaaha hodanka ah

Helo jidkiisii toosnaa

Taladaan u hayo waa

Adigoon habsaamayn

Haddeerba Ciise soo raac

Wadaaddadan hallawsani

Hadalladooda beenta ah

Marna yaanay kuba hodin

Ku hoosaasin weligaa

Kan u qaba hamuun wayn

Dhabtii inuu hanuunoo

Badbaadadan haraysay

Nimcadeeda hoos galo

Waxaan haatan oranlaa
Ku soo hiro Masiixoo
U hoggaansan maantaba

Wadaaddadan hallawsani
Hadalladooda beenta ah
Marna yaanay kuba hodin
Ku hoosaasin weliga

KANIISADDA HAREER MARI

Amin A. Ahmed

Kuwo haragga idahana
Oogada ka huwanoo
Hoostana ka yey ah
Ayaa haatan kacayoo
Qaar badan halleeyay

Sida loo horjoogsado
Rabbow nagu hagaaji
Halaaggay wadaanna
Kaniisadda hareer mari

Qaar Iblayska hororka ah
Uu u hayo hoggaankaa
Halkii ay midnimadii
Ka hirgelin lahaayeen
Kala qaybsanaan hurin

Himilooyinkoodana
Rabbow ha ku hungoobee
Kaniisadday habawsheen
Sidii hore ku soo celi

HADDABA AAN MASIIXA EEGNO
Amin A. Ahmed

Haddii maalka dunida yaal
Intuu hammigeennu raaco
Hawlihii Rabbi noo igmaday
Hiyigeennaba ka saarro
Sow hoogiyo ba'eennu maaha

Haddaba aan Masiixa eegno
Noloshuu shalay noo hibeeyay
Hanti lagu iibsan karayo
Inaan laga helayn adduunka
Xiskiyo maanka taa ku hayno

Hadduu damac ina hoggaansho
Waxaan haysanno saluugno
Oo aan u haliilno geed kale
Inaan hoobaan ka guranno
Sow maaha halaag aan doonnay

Dunidan aan haatan joogno
Masiixu hooy kumaba yeelan
Waa inaan annaguna ku hirannaa

Oo aan hilinkiisii toosnaa
Hagaag ugu sii dhaqaaqnaa

KU HUNGOOBI MAYSIDE

Amin A. Ahmed

Maalin iyo habeenba
Laabta haddaad ku hayso
Isku hallayso abidkaa
Badbaadshihii heddiisii
Daraaddaa u hurayoo
Halaag kaaba caynshay

Hubaal adigu weligaa
Haatan nolosha dunidani
Ama tan hoyga aakhiro
Ku hungoobi mayside

Adigoo hallawsanoo
Ka habaabay dawgii
Rabbigii ku helay shalay
Nimcada kuu hibeeyay
Kolkaad hadiyo jeerba
Hufnaan ugu adeegto

Hubaal adigu weligaa
Haatan nolosha dunidani
Ama tan hoyga aakhiro
Ku hungoobi mayside

XAQA KAMA HABAABO

Amin A. Ahmed

Hanashada badbaadada
Haddaad igu ilhaaminin
Marna hooygii baasiyo
Hoggaba kama baxeen
Iblays hadimadiisana
Hagaag uma garteenba

Xaqa kama habaabo
Ruuxaad hadiyo jeerba
Usha aad u haysood
Rabbow adi hagaysee

Hilinkii qalloocnaa
Dhabtii kama huleeleen
Haddii aanad igu habin
Eraygaaga hiilka leh
Ii horseeday noloshiyo
Inaan soo hanuunaba

Xaqa kama habaabo
Ruuxaad hadiyo jeerba
Usha aad u haysood
Rabbow adi hagaysee

MARNABA INUU HUNGOOBAYN

Amin A. Ahmed

Kan u heellan weligii
Inuu hoggaansanaado
Waa kan hadiyo jeerba
Baryadu hakad ka gelinoo
Gacmahana u hoorsada
Rabbigii soo hanuunshay

Galladuu maanta haystiyo
Noloshii loo hibeeyay
Ayuu hiigsadaayoo
Marnaba inuu hungoobayn
Waw hubaal middaasuye

Kan hagaag u raacay
Hadalladii Masiixa
Waa kan hoyga dunida
Hanti inuu ku yeeshaba
U hawoonin weligii
Una qabin hamuuntee

Hiyiga iyo laabtaba
Waxaa uu ku haystaa
Kolkay go'do heddiisu
Inay nimco hortii taal
Ifka aanu ku helin abid

HAATANBA QIRO BARAARKII EEBBE

Amin A. Ahmed

Inuu Ciise lama huraan yahay
Isaga la hortegi qiyaamaha
Oo uu kala haadin doono
Buunshada iyo haruurka fiican
Heddii aan weli ogayn baan
Nolosha weligeed ah hananayn

Habawsamow waxaan ku leeyahay
Haatanba qiro baraarkii Eebbee
Dartaa uba huray naftiisoo
Welina kula jecel hanuunkaba

Masiixa xagga sare u hoyday
Haddana soo noqonba doono
Dabeed kuwii isku halleeyee
Dhabtii hilinkiisii raacay
Ayuu hareeraha adduunka
Hubaal ka soo ururin doonaa

Habawsamow waxaan ku leeyahay
Haatanba qiro baraarkii Eebbee
Dartaa uba huray naftiisoo
Welina kula jecel hanuunkaba

HAAN IYO HARUUBKEED

Amin A. Ahmed

Kol haddaad i hagiyo
Usha iiba hayso
Ma hallaabo abidkay
Heddaadii aad bixisay
Aad u hurtay dartay baa
Lay hor keenayaayoo
Marna aanan halmaamayn

Haan iyo haruubkeed
Kala harin sidoodii
Haddaan nahayba maanta
Halaag kama baqaayee
I hoggaami weligaa

Hamuun bi'iyehaygiyo
Boqor hodana inaad tahay
Nolol ii hibeeyay
Oo runtii hadiyo jeer
Iga dhawra halistiyo
Hooggiyo belaayada
Rabbow waan hubaayee

Haan iyo haruubkeed
Kala harin sidoodii
Haddaan nahayba maanta
Halaag kama baqaayee
I hoggaami weligaa

KANIISADDU WAANAY HURAYNEE

Amin A. Ahmed

Kaniisaddu waxay harraadiyo
Runtii u qabto hamuun wayn
Hufnaaniyo midnimo weeyee
Rabbow hilinkaan u mari lahayn
Adigu maanta nagu hagaaji

Illayn heer waxaa la marayaa
Walaaluhu kala hayaameen
Oo aan himiladii Injiilkana
Si dhab ah loo wada hirgelinayn

Hoggaamiyeyaal bedqaba
Runtii daacad aho la hubo
Ku haga dariiqeedii toosnaa
Kaniisaddu waanay huraynee
Adigu Rabbow haatan ugu deeq

Illayn heer waxaa la marayaa
Walaaluhu kala hayaameen
Oo aan himiladii Injiilkana
Si dhab ah loo wada hirgelinayn

HOGGAANSHIHII NAFTAYDOW

Amin A. Ahmed

Sida neef hayiin ah
Heeryadii Iblaysku
Horay ii dulsaaray
Haddii aanad iga rogin
Miyaan haatan noloshiyo
Galladdaba hantiyi lahaa

Hoggaanshihii naftaydow
Habeen iyo dharaarba
Sidaad ii hagaysay
Heddayduba ku faraxdaa

Sida halaq sumsumayoo
Halis tahay suntiisii
Anoo galay hoggiisii
Aadaa igu hagoontoo
Hagar li'i badbaadada
Rabbow ii hibeeyay

Hoggaanshihii naftaydow
Habeen iyo dharaarba
Sidaad ii hagaysay
Heddayduba ku faraxdaa

BAL YAA LA HADLOO U SHEEGA

Amin A. Ahmed

Iblays i habaabin jiray
Weliba igu riday hog dheer
Haddana weli soo hagoonaa
Naftayda halaag la doonee

Wuxuuse halmaansan yahay
Inaanu i hodi karaynin
Oo aan hoos galay nimcaduu
Badbaadshahu ii hibeeyay

Bal yaa la hadloo u sheega
Inaan ahay ruux hanuunsan
Rabbiga u hoggaansan weligii

Iblayskii iga horjoogay
Inaan raaco hilinka toosan
Ayaa jecel hadiyo jeerba
Inaan isku hayb ahaanno

Wuxuu hindisaha ka saaray
Hamuunba inaan u qabin
Hoobaantuu guro i leeyahay
Oo aan horay igu hungoobay

Bal yaa la hadloo u sheega
Inaan ahay ruux hanuunsan
Rabbiga u hoggaansan weligii

HUBAAL GUUL BAYNU GAADHI

Abwaan A. K. Q. Dictionary

Hanaanka wanaagsan raaca

Hormoodkiyo guusha gaadha

Halyeeyo ayaad tihiine

Hankiina wanaajiyoo

Hubsiiimo lahaada weyn

Haddaad aragtaan masiibo

Hubkeedu wuxuu ahaaday

Hugiyo ducadiyo wanaagga

Haleela Kitaabka guusha

Hubsada wax kastoo wanaagsan

Hubaal guul baydun gaadhi

MASIIX BAAD KA HELI

Y. B. Xirsi

Dad halaysanoo

Shaydaanku hoday

Been hagoogan iyo

Dhalanteed ka hela

Hubaal looga dhigay


Kama hadhi karnoo

Injiilkan hayniyo

Xaq inay helaan

Yaan u hawlgalloo

Waanu heesaynaa



Hirkan doogga liyo
Barwaaqadan la helay
Hooygii Masiix
Aad harraad baxdide
Kaalay haatan hano

Hanfi iyo kulayl
Dad harraadanoo
Soo galay hayaan
Inay hiil helaan
Hamigeenu yahay

Nimco hoortayoo
Mahiigaanku helay
Hoobaan da'diyo
Hoosiis qabaw
Masiix baad ka heli

Hirkan doogga liyo
Barwaaqadan la helay
Hooygii Masiix
Aad harraad baxdide
Kaalay haatan hano



Y

YAAHUU INTAAN IRI

Amin A. Ahmed

Eebbe miduu u yeeroo
Shaydaan laga yureeyoo
Nolol loo yagleeloo
Waxaan ahay ka yaabayn
In yaroo dhibaato ah

Yacyacoodkii waan nacay
Iyo yaabiskii hore
Yaahuu intaan iri
Yaan ka soo hayaamay

Iblayskii yufraat iyo
Yaamayska ila tegay
Rabbaa yac iiga yiriyoo
Yeelmahiisii iga furay
Galladna ii yaboohay

Yacyacoodkii waan nacay
Iyo yaabiskii hore
Yaahuu intaan iri
Yaan ka soo hayaamay

GUNAANAD

Waxaa halkan ku dhan buuggii afaraad (volume 4) ee taxanaha Maansada Masiixa. Waxaan rajaynayaa in aad ka faa'iidaysteen suugaanta Eebbe ammaanka ah. Qasiiddooyinkan waxaa loo curiyay in Eebbe lagu xuso iyo in xerta Soomaaliyeed ee Sayid Ciise Masiix ay u ahaadaan cunto ruuxi ah oo ay ka haqab beelaan. Waxaan durba gacanta ku haynaa diyaarinta buuggii shanaad (volume 5) oo soo bixi doona qiyaastii bartamaha sannadka 2023. Waxaan idinka codsanaynaa in aad noo soo ducaysaan si Eebbe innoogu fududeeyo soo saarista buugga kan xiga.

Waxaan si gooni ah ugu mahadnaqaynaa dadkii faraha badnaa ee innala soo xiriiray iyaga oo innala wadaagaya sida taxanahani u caawiyay ama ay uga faa'daysteen. Soomaalida inala soo xiriirtay sannadkan waxay u badnaayeen Masiixiyiin balse qayb mug leh ayaa ahaa Muslimiiniin. Waxaa kale oo jira kuwo aan caqiido gooni ah ku abtirsan oo innoo sheegay in ay la dhacsan yihiin taxanahan. Dhammaantiinba Eebbe ha idin barakadeeyo hana idin ilaaliyo.

Buuggan aad iminka gacanta ku hayso waa dhaxal ay leedahay kiniisadda Soomaaliyeed. Jiilasha manta jira iyo kuwa iman doonaba waxay haystaan haddiyad qiima badan oo ay u aayi doonaan. Eebbe waxaan ka baryaynaa in uu buuggan iyo taxanaha oo idilba uu dhowro uuna gaarsiiyo meelo fogfog si looga faa'iidaysto. Waxaa xusid mudan in taxanahani yahay kii ugu horreeyay ee caynkiisa ah oo ay kiniisadda Soomaaliyeed abid soo saarto. Waxaan rejo wayn ka qabnaa in buugaag iyo taxanayaal kale oo la mid ah amaba ka wanaagsan Maansada Masiixia ay Masiixiyiinta Soomaaliyeed mar uun soo saari doonaan.







Taxanaha Maansada Masiixa looma soo saaro in laga helo faa'iido lacageed balse waxaa loo daabacaa si looga faa'iidayso iyada oo aan la bixin wax lacag ah. Tani waa sababta taxanahani si bilaash ah aad uga soo degsan karto meelo badan adiga oo isticmaalaya internetka. Waxaa kale oo dadka haysa nuqul ka ka mid ah taxanahan ay isugu gudbin karaan siyaabo kale geddisan. Haddaba, Waxaan ku guubaabinaynaa Masiixiyiinta Soomaaliyeed in ay wixii qasiiddooyin ah oo ay alifaan innoo soo diraan si loogu biiriyo buuggaagta soo socota ee ka tirsan taxanahan iyaga oo isticmaalaya e-mailkan amazingwisdom@gmail.com.






Aweis A. Ali


ABOUT THE EDITOR

Aweis A. Ali, PhD, is a missiologist and a leading authority on the persecuted church in the Muslim world with special expertise on the Somali church. He became a disciple of Christ in 1986 through the ministry of SIM. Aweis was a co-pastor of a house church in Mogadishu, Somalia, in the mid-1990s when 12 of the 14 members were martyred for their faith. Aweis has been ministering in the Muslim world since 1993; he has lived and served in world areas that include the Horn of Africa, East Africa, West Africa and the United States. Aweis earned a B.Th. degree from the Evangelical Theological College in Addis Ababa; an M.Div. from Nazarene Theological Seminary in Kansas City, Missouri; and a Ph.D. from Africa Nazarene University in Nairobi. Aweis' Ph.D. thesis is titled "Persecution of Christians and its Effect on Church Growth in Somalia." Aweis is the author, editor or translator of 12 books and more than a dozen articles. He is the founder and the Series Editor of the annual Maansada Masiixa (Anthology of Somali Christian Poetry) as well as the Somali Bible Society Journal, the official biannual journal of the Somali Bible Society. The author's research interests include the persecution of Christians, church history and church growth in the Muslim world; Waaqism, Judaism, Christianity and Islam in the Somali peninsula; global paremiology and Somali poetry. Dr. Aweis can be reached at: amazingwisdom@gmail.com. Twitter: @DrAweisAli. Website: <https://aliaweis.academia.edu/>

OTHER BOOKS BY THE AUTHOR







KENPRO
PUBLICATIONS

ISBN 978-9914-9929-8-4

